

# QAABKA HORUMARINTA DEGMADA QARDHO QHD (DDF)



Figure 1 Sumada Degmada Qardho



Figure 2 Map degmada Qardho

## I. MAHADNAQ

II. LIISKA EREYADA LA SOO GAABSHEY (abbreviation)

III. LIISKA SHAXDA. (list of tables)

IV. Hordhac

**CIWAANADA**

**Qaybta kowaad**

**Xalada Degmada Qardho (District profile)**

Taariikhda Degmada

Khariirada Degmada

Maamulka Degmada

Qiimeynta Saboolnimada Degmada

Arimaha bulshada

Qiimeynta dhaqaalaha Degmada

Adeeg iyo Adeeg bixinta Degmada

**Qaybta Labaad**

**Baahiyaha iyo Mudnaanta Heer Qaran (National Requirement and priority)**

Waxbarashada

Caafimaadka

Howlaha Guud iyo kaabayaasha

Biyaha iyo Nadaafada

Ilaalinta Deeganka

Horumarinta Arimaha qowska iyo Haweenka

Beeraha

Xoolaha

Amniga iyo Cadaalada

Adeegyada laga rabo Golaha Deeganka

**Qaybta Saddexaad**

**Natijada Latashiga Bulshada**

Caafimaadka

Waxbarashada

Nadaafada

Deeganka iyo Xoolaha

Biyaha

Wadooyinka

Suuqyada iyo Xarumaha Bulshada

Baahiyaha ugu Waaweyn Bulshada

Mudnaanta Degmada

**Qaybta Afraad**

**Ujeedoyinka iyo Faragalinta**

Himilada Degmada

Ujeedada

Faragalinta

**Qaybta Shanaad**

**Saadaalinta**

Saadaalinta Dakhliga

Saadaalinta kharashka

Qorshaha sanad laha ah ee Degmada 2010

Gunaanad

## 001 Mahad-naq

Ugu horrayn Eebbe ayaa mahad leh, isagaa ayaana noo suurta geliyey awoodna noo siiyey diyaarinta qormadaan.

Waxaa la qadderinayaa mahadna loo celinayaa shakhsiyaadkii sida weyn isugu taxallujiyey, dadaalka badan u soo galay, waqiga qaaliga ahna hawshaan ku bixiyey oo lagu xusayo:

- Guddoomiyaha golaha degaanka degmada Qardho
- Guddiga joogtada ah ee golaha degaanka (GJ)
- Xoghayaha fulinta dowladda hoose
- Xoghaynta golaha degaanka ee degmada Qardho
- Guddiyadii la-tashiga ee xaafadaha
- Hay'adihii & xafiisyadii kala duwanaa ee xogta laga helay
- Aqoon-yahannadii iyo xirfadleydii sida tabarruca ah kaalmada geystey
- Shakhsiyaadkii iyo hawl-wadeennadii qoritaanka, daabacaadda iyo soo-saarista ka qayb qaatay.

Dhammaantood inta la xusay in badano kale oo aan la carrabaabin waxaa loo jeedinayaa mahad-naq iyo boogaadin, taageeradii iyo dowladii ay hawsha qormadaan ka galeen.

## 002 Ereyada la soo gaabshey (Abbreviation)

- DC, District council
- DDF, District development framework
- QHD, Qaabka horumarinta degmada
- GJ, Guddiga joogtada ah
- DQ, Degmada Qardho
- JPLG, Joint program on local governance
- DRC, Danish refugee council
- UNICEF, United Nation Children' Fund
- UNDP, United Nation Development Program
- AAH, Action Africa Help
- MOILG&RD, Ministry of interior, local government & rural development
- DPPBP, District participatory, planning & budgeting process
- AWPB, Annual work plan and budget
- AWP, Annual work plan

### 003 List Picture (Liiska Sawirada)

Figure 1 Sumada Degmada Qardho.....	1
Figure 2 Map degmada Qardho.....	1
Figure 4 Khariirada Degmada Qardho.....	11
Figure 5 Xarunta Maamulka Degmada.....	12
Figure 6 Goobaha Qaxootiga iyo barkacayaasha.....	16
Figure 7 Xarunta Waxbarshada iyo Dugsiyada Deg.....	18
Figure 8 Xarunta Caafimaadka G/Degmada Cisbitaalka guud.....	19
Figure 9 MCH & HP Degmada.....	19
Figure 10 Heerka Shaqo La'aanta.....	20
Figure 11 Xoolaha Nool.....	20
Figure 12 Suuqa kaluunka Degmada.....	21
Figure 13 Xawilaadaha.....	22
Figure 14 Burburka Laamiga.....	23
Figure 15 Ololaha lagu Bannaynayo Jidadka laguna hagaajinyo.....	23
Figure 16 Xarumaha shirkadaha Telefonnada.....	24
Figure 17 Xarunta Biyaha Degmada.....	26
Figure 18 Ceelasha oo ay xoolo ka cabbayaan.....	26
Figure 19 Xarunta korontada EENE Qardho.....	29
Figure 20 Xirmo-cawseed.....	30
Figure 21 Odayaasha Degaanka & arrimaha nabadaynta.....	32
Figure 22 Saldhiga Booliska Degmada.....	32
Figure 23 Maxkamada Gobolka & Degmada.....	32
Figure 24 Xabsiga gobolka Karkaar.....	33
Figure 25 Suuqyada weyn ee hadda jira.....	46
Figure 26 Suuqa khudaarta & hilibka.....	47
Figure 27 Ololaha Nadaafadda & qashin-ururin.....	49
Figure 28 Bilicda Beeraha Bartamaha Magaalada.....	50

### 004 List Tables (Liiska tasmada Shaxda)

Table 1. Kala Qeybsananata dadweynaha Isha xogta: D/ hoose ee degmada.....	15
Table 2 Muujinaysaa Da'da Isha xogta: dawladda hoose ee degmada qardho ...	15
Table 3 Dadka aan waxna qorin waxna aqrin Isha xogta: Guddoon wabarashada	18
Table 4 Wiilasha iyo gabdhaha D-hoose Isha xogta: Guddoonka waxbarashada	18
Table 5 Waxbarashada Isha xogta: Guddoonka waxbarashada.....	18
Table 6 Caafimaadka Degmada. Isha xogta: Guddoonka caafimaadka.....	19
Table 7 Heerka Shaqo La'aanta Isha xogta : dawladda hoose.....	20
Table 8 Qiimeynta Dhaqaale. Isha Xogta D/hoose.....	21
Table 9 Celceliska Jirtaanka Waara Isha xogta: dawladda hoose.....	21
Table 10 Shirkada Xawilaada Isha xogta: dawladda hoose.....	21
Table 11 Heerka biyo la'aanta Isha xogta: PSWEN.....	27
Table 12 Heerka Koronto gelinta Isha xogta: WXKU -Qardho.....	28
Table 13 Idaacadaha ka jira degmada Isha warka : Dawladda hoose.....	29
Table 14 Mashaariicdii ka hirgelay degmada Xogta: Dawlada Hoose Qardho.....	37
Table 15 Sadaalinta Dakhliga degmada.....	57
Table 16 Sadaalinta Kharashka Degmada.....	58
Table 17 Qorshaha shaqo degmada sanadka 2010.....	60

## 1. Hordhac (Qaabka horumarinta degmada-QHD)

Qaabka horumarinta degmadu wuxuu ururiyaa dhammaan xogaha saameeya lana xiriira degmada kuna aaddan arrimaha bulshada, dhaqaalaha, dhaqanka, nabad-gelyada, dhammaan hawlaha himilada bulshada asteeya iyo guud ahaanba danaha degmada ee xillyada dhow/dhexe iyo muddada fog iyadoo isla markaana la soo ban-dhigayo qorshe meelmar ah oo xaladahaas ka jawaabaya.

Qaabka horumarinta degmadu waa tiginka marjaca iyo raad-raaca u ah qorshaha, barnaamijyada iyo mashaariicda lagu horumarinayo dhinacyada kala duwan ee nolasha bulshada degaanka. Suurta-gal ma aha in horumar la toogeysto, maaraynta hawlaha bulshadana laga miro-keeno haddii aan qaabkaan la astayn.

Qaabka horumarinta degmada waa qormo nuxur ahaan looga gol leeyahay ujeedooyinka ay ka midka yihiin:

1. Xaddidaadda baahiyaha degmada oo lagu gaarayo la-tashi la la yeesho qaybaha kala duwan ee bulshada ku nool degmada iyo tuulooyinkeeda, iyadoo isla markaana la tixgelinayo kala-mudnaanta, laguna salaynayo daraasad iyo xog dhab ah oo xirfadaysan.
2. Qeexidda caqabadaha jira ee dabri Kara ama carqaladdaba ku ah horumarinta degmada, iyadoo isla markaana la taabayo lana cayimayo tabaha iyo istaraateejiyada looga gudbi karo laguna maarayn karo.
3. Is waafajinta qorshaha iyo ujeedooyinka horumarineed ee degmada iyo kuwa heer qaran.
4. Dejinta qorshe meelmar ah kuna aaddan muddada dhow/dhexe iyo muddada fog iyadoo isla markaana la sugayo dhammaan aaladaha laga ma maarmaanka u ah fulinta marxaladaysan ee barnaamijyada iyo mashaariicda qorshaha degsan soo gala.
5. Ka qayb-gelinta xubnaha bulshada go'aaminta siyaasadda, hawlaha iyo dejinta qorshaha horumarinta degmada, taasoo u macna-dhacaysa sugidda kalsoonida iyo taageerada bulshada iyo abuuridda dareenka lahaansho (ownership) ee dadweynaha.

Si loo diyaariyo qormo dhammaystiran kuna saabsan qaabka horumarinta degmada waxaa si is daba joog ah loo qaaday tallaabooyinka soo socda:

- Golaha degaanka, xoghayaha fulinta iyo xubno ka kala socda qaybaha bulshada ayaa wada yeeshay kulan looga wada hadlay loogana tashaday sidii loo diyaarin lahaa qaabka horumarinta degmada

iyadoo isla markaana la isla meel-dhigay hab-raaca fulinta hawshaas loo adeegsanyo.

- Waxaa la magacaabay kooxo loo xil saaray soo ururinta xogaha laga ma maarmaanka u ah barnaamijka diyaarinta qaabka horumarinta degmada iyadoo loo cayimay arrimaha ay ka midka yihiin:
  1. Taariikhda, meel-dhaca juqraafi, xaaladda dimograafikada, cimilada, khayraadka dabiiciga ah, waaqica dhaqan-dhaqaale, kaabayaasha dhaqaale, adeegyada bulsho iyo guud ahaan arrimaha saameeya nolasha dadka ee degmada.
  2. Baahiyaha kala duwan ee jira iyo kala mudnaanshahooda iyadoo la la tashanayo xubnaha bulshada ee tuulooyinka iyo miyiga ee degmada hoos yimaada, si gaar ahna farta loogu fiiqayo baahida asaasiga ah.
  3. Xaddidaadda caqabadaha hakin kara ama carqaladayn kara tallaabooyinka lagu maaraynayo xallinta dhibaatooyinka la cayimay
  4. Hubinta iyo qiimaynta wax-qabadka ku aaddan qorsheyaashii hore loo jideeyey.
  5. Dejinta qorshaha horumarinta degmada.
- Guddiga horumarinta ee golaha degaanka, adeeg bixiyaal, aqoonyahanno iyo xubno kale oo ah bulshada rayadka ah ayaa socdaal dheer ku maray tuulooyinka iyo dhammaan degaamada kala duwan ee degmada Qardho hoos yimaada.

Mas'uuliintani waxay soo ururiyeen natiijooyinkii ka soo if baxay la-tashiyo la la yeeshay bulshada degaamada iyo tuulooyinka kala duwan ee qiimeynayey xaaladaha iyo baahiyaha goobahaas ka jira.

- Xubnaha golaha degaanka ee degmada Qardho iyadoo la tixgelinayo,
  1. Tala-bixinta guddiga dhaqaalaha iyo horumarinta degmada,
  2. Natiijooyinkii la-tashiga bulshada ka soo baxay,

Waxay, iyagoo ka duulaya soo jeedintoodana arrimaha kor ku xusan ku salaynaya tilmaan ka bixiyeen hawlaha mudnaanta leh.

- .Golaha degaanka iyo hawl-wadeennada hay'adda fulinta ee dowladda hoose waxay xaddideen tuduc ujeeddooyin ah oo loo baahan yahay in xaqiijintooda loo saan-qaado kana soo jeeda qorshaha 5-ta sano ee degmada oo ka bilaabanaya sanadka 2010.

Maadaama uu qaabka horumarinta degmadu yahay barnaamij macne weyn bulshada u leh isla markaana ah aaladda dhabta ee hawlaha horumarinta lagu maaraynayo waxaa la isku taxallujiyey in diyaarintiisa lagu saleeyo aragtida, talada iyo dareenka qaybaha kala duwan ee bulshada degmada Qardho.

Dhammaan mas'uuliintii iyo hawl-wadeennadii ka qayb qaatay diyaarinta hawlaha qaabka horumarinta degmada ku saabsan wax dhib ama carqalad ah kala ma ayan kulmin hawsha maadaama la fuliyey barnaamij wacyi-gelin oo muddo taxnaa arrintana la xiriiyey.

## **2.0 Taariikhda iyo khariiddada Qardho**

### **2.1 Taariikhda magaalada**

Qardho waa magaalo-madaxda gobolka Karkaar iyadoo sida la ogsoon yahay horayna u ahaan jirtey degmo ka tirsan gobolka Bari.

Waxay ka mid tahay magaalooyinka ugu muhimsan Puntland,markii la fiiriyo ahmiyadda meel-dhaceeda juqraafi,cimilada,dhulka daaqsimada ku fiican iwm.

Qarddho waxaa la degey qarniyaal ka hor, waxay magaalowdey dhammaadkii qarnigii 19-aad iyadoo si rasmi ah degmo loogu aqoonsaday sanadkii 1930.

Sanadkii 2003 waxay Qardho noqotay magaalo-madaxda gobolka Karkaar ee Puntland.

Magaalada Qardho waxay meel la xuso kaga jirtaa taariikhda iyo dhaqanka soo-jireenka ah ee Soomaalida, sidaa darteed waxay leedahay kayd ballaaran oo astaynaya suugaantii iyo dhaqdhaqaaqyadii siyaasadeed ee hanashadii gobonnimada ka horreeyey.

Waxaa xusid mudan in xilligii dowladdii dhexe ay Qardho ahayd xarun maamul oo laga maareeyo hawlaha dowladda dhexe ee gobollada qaarkood ku aaddan,taasoo waagaas magaalada macne iyo qiime dheeraad ah u yeeshay.

Kaalinta maamul ee ay Qardho kaga jirtey maaraynta barnaamijyada iyo mashaariicda dowladda waxaa laga garan karaa sida ay dhismooyinka dowladdu ugu badan yihiin, inkastoo ay haatan badankood dayactir iyo dib-u-dhis u baahan yihiin.

Intii burburka ka horreysey oo ay degmo ahaan ka tirsanayd gobolka Bari waxay Qardho xilliga xagaaga ahaan jirtey magaalo-madaxda gobolka Bari,iyadoo maamulka gobolka u ahaan jirtey saldhig iyo goob hawlihiisa laga hago.



Bulshada Degmada Qardho waa reer guuraa xoolo dhaqashada ku tiirsan.

Degmadu waxay ka kooban tahay magaalo-madaxda Qardho iyo 26 tuulo .

Degmada Qardho waxay juqraafi ahaan ku fadhidaa baaxad dhan 7,000 Km<sup>2</sup>.

Markii la fiiriyo xaaladda topogaraafikada Qardho waxay badda ka sarraysaa taag dhan 850 m.

Magaalada Qardho iyo tuulooyin badan oo ka tirsan waxaa dhexmara jid laami ah oo isku xira Boosaaso, Qardho, Garowe iyo Gaalkacyo, dhererkiisuna dhan yahay 675 Km. Jidkani waa kaabaha halbowlaha u ah dhaqaalaha, dhaqdhaqaaqa iyo isu socodka dadka iyo kala gudbinta badeecdaha.

Magaalada Qardho waxay magaalada dekedda ee Boosaaso u jirtaa masaafad dhan 238 Km, halka ay caasimadda Puntland ee Garowe u jirto 215 Km.

Celcelis ahaan roob-sanadeedka degmada ka da'aa waa 150-400 mm. Waxay degmada Qardho leedahay oo uu Eebbe ku mannaystay cimilo aad u wanaagsan oo u dhexaysa 18-35 darajo markii laga reebo bilaha December iyo January oo ay qiyaastii 11-13 darajo gaarto.

Cimiladani waxay soo jiiddey in dad badani ku soo qulqulaan xilliga xagaaga ee ay degaamda xeebuhu cimilo kulul yihiin.

Degmada Qardho waxay xuduud juqraafi la leedahay gobollada Bari, Sanaag, Sool iyo Nugaal, waxayna dhacdaa goob istrateeji ah oo ahmiyad ballaaran u yeeshay.

Tirada dadwaynaha ku nool degaanka degmada Qardho guud ahaan waxaa lagu qiyaasaa 85,000 oo qof, oo 35,000 oo ka mid ahi ku nool yihiin gudaha magaalada Qardho iyadoo tirada reer guuraaga ee miyiga iyo tuulooyinku dhan yihiin qiyoaas 50,000 qof.

Waxaa tiradaas dheer oo magaalada Qardho ku nool barakacayaal lagu qiyaasay ilaa 1,603 qoys.

Dagaalladii sokeeye ee dalka ka dillaacay waxay sababeen in dad badan oo ku noolaa gobollada dhexe iyo koofureed ay ku laabtaan degaamadii ay hore asal ahaan uga soo jeedeen oo ay u dhasheen, arrintaas oo ay Qardho sedkeeda ku yeelatay.

Waxaa sidoo kale jira dad aan geyigaan ka soo jeedin ama u dhalanin oo ka soo barakacay gobollada aan xasiloonaayn haatanna Qardho ku nool.

Arrimaha la soo xusay waxay dhaliyeen dhaqdhaqaaq dimograadik ah oo magaalada si la dareemi karo u saameeyey, iyadoo sida la ogsoon yahay ay adeegyada bulsho iyo kaabayaashu horeba Qardho ciriiri ugu ahaayeen.

Intii ka dambeysey burburkii dowladdii dhexe korriimo la tilmaami karo ka ma jirin Qardho oo haddii uu kororba jirey waa wax aan sidaa u sii ridneyn, gaar ahaan haddii la garab dhigo magaalooyinka Boosaaso (xarunta ganacsiga) iyo Garowe (caasimadda Puntland).

Waxaan shaki ku jirin in magaalada Qardho ay leedahay arrimo badan oo horseedi kara inay si tayo leh u korto una saan-qaaddo horumar haddii si qorshaysan looga hawlgalo lana taabo tabihii iyo istaraateejiyaddii himiladaas lagu xaqiijin lahaa.

Waxaa laga ma maarmaan ah in qaabka horumarintu noqdo mid lagu asteeyo qorshe marxaladaysan oo ballan qaadaya horumarinta degmada si ay u noqoto geyi cammيران oo soo jiita maal-gashiga, ganacsiga, mashaariicda adeegyada, kuwa xanaanada xoolaha, warshadaha iyo kaabayaasha la xiriira, taasoo u baahan in si hagaagsan loo maalo khayraadka iyo fursadaha degmada ka jira ee uu Eebbe ku mannaystay uguna hiiliyey.

Barnaamijka qaabka horumarinta degmada Qardho waxay fulintiisu u baahan tahay taageerada iyo hiilada dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada Qardhood, iyadoo sidoo kalena ay laga ma maarmaan tahay helitaanka taageerada iyo kaalmada dowladda Puntland iyo deeq-bixiyeyaasha.

Waxaan meesha laga saari karin dowladka weyn iyo kaalinta hormuudka ah ee ay aqoon-yahannada, indheergaradka iyo ganacsatadu arrinta ka geli karaan.

n

## 2.2 Khariiddada Qardho

Khariiddada magaalada Qardho waxay si caad-yaal u muujinaysaa suuradda guud ee magaalada iyo qaybaha sida, degaanka (xaafadaha), xarumaha maamulka, suuqyada & goobaha ganacsiga, xarumaha adeegga bulshada, sida caafimaadka iyo waxbarashada, beeraha nasashada, waddooyinka, hotellada, masajiddada, hoosooyinka, barxadaha, xarumaha IDPs-yada, gegada dayaaradaha, togagga, saldhigga korontada, xarumaha ciidamada, xabsiga iwm.

Magaalada Qardho waxay ka kooban tahay 28 xaafadood oo kala ah, Wadajir, Kubo, Xingood sare, Xingood hoose, Kaambo, Shinbiraale, Qoryacad, Gacan libaax, Xorgoble, Jedad, Shire, Yaka, Guudcad, Canbaar sare, Xabaal reer, Carmo, Dhaxan, Adisoone, Sanjilbo, Gerihel, Higlo, Libow, Xeradaa muudal, Dhaxan busur, Ceeley Shaxda Qormo-Burcad iyo Qalwo.




Figure 3 Khariirada Degmada Qardho

## 2.3 Maamulka Degmada:

Maamulka degmadu wuxuu u dhisan yahay qaab waafaqsan nidaamka dhismaha degmooyinka ee u degsan dowladda una hoggaansan dastuurka Puntland.



Figure 4 Xarunta Maamulka Degmada

Hoggaanka maamulka degmadu wuxuu guud ahaan ka kooban yahay:

### 2.3.1 Golaha degaanka

Golahaan waa hay'adda u sarraysa ee hawlaha degmada ka arrimisa, waxaana laga soo xulaa bulshada degaanka si u hoggaansan nidaam la isku waafaqay oo hore loo qoondeeyey.

Golaha degaanka degmada Qardho waxaa la dhisay 27/12/2005

Golaha degaanku wuxuu ka kooban yahay 27 xubnood oo isugu jira 25 xubnood oo rag ah iyo 2 xubnood oo gabdho ah oo xilalka soo socda kala leh:

- Guddoomiye,
- Guddoomiye xigeen,
- Xubnaha guddiga joogtada ah, 7 Xubno,
- Xubno, 18

Awoodaha goluhu waxay ku cad yihiin xeer Madaxweyne oo golaha xukuumadda laga ansixiyey iyadoo uu golaha wakiiladu oggolaaday.

Golaha degaanka waxaa guddoomiye u ah duqa degmada oo dhan kalena madax ka ah hay'adda fulinta (duqa degmada). Golaha degaanka waxaa hawlihiisa ku kaaliya xoghayn u gaar ah.

### 2.3.2 Hay'adda fulinta

Qaybtani waxay mas'uul ka tahay socodsiinta hawl-maalmeedka iyo fulinta barnaamijyada & mashaariicda horumarinta degmada ee uu golaha degaanku ansixiyo.

Hay'adda fulinta dowladda hoose waxaa hoggaamiya duqa degmada oo isla markaana ah guddoomiyaha golaha degaanka ee degmada, waxayna ka kooban tahay 5 waaxood oo kala ah:

1. Waaxda arrimaha bulshada
2. Waaxda hawlaha guud
3. Waaxda dakhliga iyo cashuuraha
4. Waaxda maamulka iyo dhaqaalaha iyo
5. Waaxda kormeerka iyo barista


### **2.3.3 Qaab-dhismeedka maamulka degmada**

Si maamulka degmadu u hanto mas'uuliyadda maaraynta hawlaha waxaa laga ma maarmaan ah noqotay in la dejiyo laguna dhaqmo qaab-dhismeed ku aaddan si buuxdana uga turjumaya baahida degmada ee muddada dhow/dhexe iyo muddada fog.

Qaab-dhismeedku waa aaladda loo asteeyo fulinta hawlaha iyo mashaariicda qorshaysan taasoo ku salaysan awoodda dhaqaale, itaalka maaliyadeed iyo cududda dadeed ee hay'adda fulinta.

Ku tala-galku wuxuu yahay in qaab-dhismeedka loo horumariyo si la socota baahida, isla markaana la saan-qaadaysa korriimada mustaqbalka iyo awoodda wax-qabad ee maamulka degma

*Qaab Dhismeedka Maamulka Dowladda Hoose ee Degmada*



**Shaxdani waxay muujinayaa tirada iyo kala qaybsanaanta dadweynaha ku nool degmada Qardho**

Noocyada Dadweynaha	Tirada Guud	Tirada Qoysaska	%	% dadka Magaalada	% Reer Miyiga	% Ragga	% Dumarka
Dadweynaha Deegaanka	85,000	14,167	77.54	35	65	45	55
Barakacayaal	9,618	1,603	8.77				
Xilliyeed	15,000	2,500	13.69				
	<b>109,618</b>	<b>18,270</b>	<b>100</b>				

**Table 1.** Kala Qeybsananata dadweynaha *Isha xogta: dawladda hoose ee degmada Qardho*

**Shaxdani waxay muujinaysaa da'da**

0 - 14 Sano	15 - 64 Sano	65+	Dadweynaha ku nool magaalada
40 %	57 %	3 %	35 %

**Table 2** Muujinaysaa Da'da *Isha xogta: dawladda hoose ee degmada qardho*

**2.4 Heerka Saboolnimada ee Degmada Qardho**

Hab nololeedka dadweynaha degmada Qardho waxaa ugu weyn oo uu ku tiirsan yahay xoolaha nool, lacagaha debadda laga soo diro iyo ganacsiyo yar yar oo magaalada dhexdeeda lagu haysto badina ay haweenku ku lug leeyihiin, waxaa intaa dheer dhaqaale kooban oo xabkaha iyo beeyada ka soo jeeda.

Degmada Qardho ma leh beero badan ama xeeb laga kaluummaysto iyo wax-soo-saar badeed.

Dadka magaalada deggeni waxay badi ku tiirsan yihiin, noloshoodana ku xiran tahay miyiga, kaasoo ay waayahaan dambe abaaro is daba joog ah iyo nabaad guur si daran u saameeyeen.

Arrintani waxay dhaliisay in xoolihii le'daan dadkiina ay iyagoo fara maran magaalada ku soo xeroodaan.

Waxaa klaoo xusid mudan in dad faraban oo ka soo qaxay goballada aan xasiloonaayn ee ay dagaalladu aafeeyeen ay ku sugan yihiin xaalad nololeed oo heerka saboolnimada ka hooseeysa.



Figure 5 Goobaha Qaxootiga iyo barkacayaasha

#### 2.4.1 Waxyaabaha sababay Saboolnimada Bulshada:

Degmada Qardho waxaa ka jirta xaalad saboolnimo oo aad ugu baahsan bulshada dhexdeeda. Heerka faqiirnimada bulshadu labadii sano ee la soo dhaafay kor ayuu u kacayey, iyadoo 80% in ka badani ku sugan yihiin xaalad ka hoosaysa cabbirka saboolnimada, sababo badan oo laga xusi karo:

- a) Dadkii ku barakacay kuna afoobey abaarihii iyo barafkii ka dambeeyey oo ku soo xerooday xeryaha qaxootiyada iyo IDPs-ka degmda Qardho kuwaas oo aan helin kaalmo iyo taageero ku filan.
- b) Abaaraha is daba-joogga ah, roob la'aanta, xaalufka iyo burburka deegaanka oo si silloon u saameeyey wax-soo-saarkii iyo ishii ugu muhimsaneyd ee ay nololaha bulshadu ku tiirsanayd.

Arrintani waxay soo jiiddey darxumo soo wajahdey reer guuraaga oo ay suuq-geyntii xooluhu ka istaagtey, isla markaana waayey awood ay raashin, daawo, biyo iyo badeecado kaleba ku iibsadaan.

- c) Dhibaataada burcad-badeedda oo noqotay afo soo if baxday oo raad xun ku yeelatay maciishadda soona jiiddey:
  - Kirada gaadiidka badeecadaha rara oo sare u kaca
  - Ascaarta raashinka, shidaalka, biyaha iyo badeecadaha kale oo uu koror weyni ku dhacay



Dhibaataada ka dhalatay burcad-badeedku waxay sii culaysay saboolnimadii ay horeba bulshadu, gaar ahaan reer guuraaga iyo cayrtuba la tabaalaysnaayeen.


d) Shaqo la'aanta oo degmada iyo magaalada Qardho ku baahsan, kana mid ah arrimaha saamayska weyn saboolnimada ku leh.

Degaanka Qardho ka ma jiraan barnaamijyo iyo mashaariic shaqo laga helo, iyadoo dhan kalena aan warshado, ganacsi iyo goobo wax-soo-saar oo la sheego lahayn. Waxaa intaas dheer maamulka dhexe ee dowladda, hay'adaha iyo ururrada caalamiga oo aan fursadihii shaqo ee loo baahnaa laga helin.

e) Shirkado maal-gelineed oo aan jirin, iyadoo sida la ogsoon yahay ay degmada Qardho ka jiraan fursado la maali haddii maal-gashi loo helo.

f) Dhibaataada dhaqaale xumo iyo sicir bararka guud aan caalamka soo food saaray.

**Heerka saboolnimada ee 2007-2009**



## 1.5 ARIMAHA BULSHADA

### 1.5.1 Waxbarashada

#### Dadka aan waxna qorin waxna akhriyin

Ragga qaangaarka ah	Dumarka qaangaarka ah
35%	65

**Table 3** Dadka aan waxna qorin waxna aqrin *Isha xogta: Guddoonka wabarashada*

#### % wiilasha iyo gabdhaha ee dugsiyada hoose

Wiilal (6-15)	Gabdhaha	Inta diiwaangelisa	is
62%	38%	50%	

**Table 4** Wiilasha iyo gabdhaha D-hoose *Isha xogta: Guddoonka waxbarashada*

#### Tirada Dugsiyada, ardayda iyo macallimiinta

Dugsiga	Tirada dugsiyada	Tirada ardada	Tirada macallimiinta	Isku-aadka macallin/arday
Dugsi sare	4	1,268	70	18
Hoose/dhexe	40	4,300	250	11
Dugsi quraan	58	5,050	116	44
Waxb/dadban iyo dugsiyada gaarka ah	23	460	69	7
Macaahid	3	180	12	15

**Table 5** Waxbarashada *Isha xogta: Guddoonka waxbarashada*



**Figure 6** Xarunta Waxbarashada iyo Dugsiyada Deg

### 1.5.2 Adeegga Caafimaadka

Degmada Qardho waxaa 3-dii sano ee ugu dambeeyey dhanka adeegyada caafimaad iyo tababarrada shaqaalaha caafimaadka ka taageerayey

hay'adaha Save the Children UK iyo AAH oo xarumo ku leh magaalada Qardho.



Figure 7 Xarunta Caafimaadka G/Degmada Cisbitaalka guud

Adeegyada ay hay'adahaani fidiyaan ma aha kuwa ku filan oo dabooli kara baahida bulshada degmada.

Dhan kale waxay degmadu ka qatan tahay kaabayaal badan oo adeegga caafimaadka la xiriira.

Waxaa mararka qaarkood daawo iyo qalab caafimaad oo xaddidan keena qurba-joogta degmada Qardho ka soo jeedda.



Figure 8 MCH & HP Degmada

**Adeegyada iyo agabka caafimaad ee hadda jira**

Noocyada daryeelka caafimaadka	Xarumaha	Tirada	Tirada shaqaalaha	Qalabka yaal
Isbitaalka guud	1	46		1 Raajo iyo 40 Sariirod
MCH	2	13		
Farmishiyeyaasha	55	105		
Bar caafimaad	14	42		
Sheybaarro	11	23		
Xarunta TB	1	9		
<b>Tiro Guud</b>			<b>238</b>	

Table 6 Caafimaadka Degmada. Isha xogta: Guddoonka caafimaadka

### 1.5.3 Shaqada

Sida cutubyada sare ee qormada lagu soo xusay heerka shaqo la'aantu waa mid aan sinnaba garowsiimo loogu heli karin.

Shaqadu waxay ka mid tahay xuquuqda asaasiga ah ee muwaadinka si uu saboolnimada uga baxo, karaamo iyo xurmana ugu noolaado.

Dhan kale shaqaaluhu waa cududda wax-soo-saarka, kobcinta dhaqaalaha iyo fulinta barnaamijyada horumarineed ee bulshada.

Fursadaha shaqo waxay sidoo kale ahmiyad u leeyihiin nabadgelyada iyo amniga bulshada.

#### Shaxdani waxa ay muujinaysa heerka shaqa la'aanta

Ilaha dakhliga	Boqolkiiba %
Inta mushaar qaadata	4
Inta iskeed u shaqaysata	16
Inta aan shaqayn	75
Inta hawlgabka ah	3
Inta aan shaqayn Karin	2
Isugeyn	100

**Table 7** Heerka Shaqo La'aanta *Isha xogta : dawladda hoose*



**Figure 9** Heerka Shaqo La'aanta

## 1.5 QIIMEYNTA DHAQAALAHAA EE DEGMADA QARDHO

### 1.5.1 Ilaha dakhliga ee degmada qardho

Ilaha tiirka u ah dhaqaalaha degmadu waa wax-soo-saarka xoolaha, ganacsiga, lacagaha ay qurba-joogtu soo xawilaan iyo deeqaha hay'adaha oo kooban.



**Figure 10** Xoolaha Nool

Qaybaha wax-soo-saarka	%
Xoolaha	60%
Ganacsiga	30%
Waxbarashada	1%
Isgaarsiinta	1%
Xawaaladaha	6%
INGOs & UN-agencies	2%
	100%

**Table 8** Qiimeynta Dhaqaale. Isha Xogta D/hoose  
*Celceliska jiritaanka waara ee ganacsiga*

Jiritaanka ganacsiga	Boqolkiiba %
Inta ka yar 3 sano	50%
3-5 Sano	26%
5-7 Sano	12%
10 sano waxii ka badan	12%
	100%

**Table 9** Celceliska Jirtaanka Waara Isha xogta: dawladda hoose



**Figure 11** Suuqa kaluunka Degmada

### 1.5.2 Xawaladaha ka shaqeeya Qardho

Magaca shirkadda	Goobta
Dahabshiil	Wadajir
Amal	Wadajir
Adeegga Sahal	Xaafadaha oo dhan (mobile electronic service)
Qaran	Wadajir
Tawakal	Xingood
Iftin	Xingood
Mustaqbal	Bartamaha magaalada
Bakaal	Bartamaha magaalada
Kaah	Bartamaha magaalada

**Table 10** Shirkada Xawilaada Isha xogta: dawladda hoose



*Figure 12 Xawilaadaha*

Sida laga arki karo xogta shaxda dhaqaalaha ku urursan dhaqaalaha degmadu waa mid aad u hooseeya, arrintaas oo si toos ah u saamaynaysa heerka maciishadda, dakhliga, fulinta mashaariicda caamka ah iyo kuwa gaarka, fursadaha ka faa'ideysiga khayraadka iwm.

Arrimaha loo tirinayo hoosaynta dhaqaale ee degmada waxaa laga xusi karaa:

- Wax-soo-saarka la xiriira xoolaha oo si joogto ah hoos ugu dhacaya
- Maqnaanshaha maal-gashi
- Ganacsi itaal leh oo aan jirin
- Kaabayaasha dhaqaalaha oo aan jirin
- Degmada oo ayan warshado ka jirin
- Shaqo la'aanta oo xad-dhaaf ah
- Dakhliga dowladda hoose oo aad u hooseeya markii loo fiiriyo baaxadda iyo mugga barnaamijyada, mashaariicda iyo hawlaha looga fadhiyo
- Sicir-bararka sida joogtada ah isu soo taraya
- Aqoonta xirfadeed ee maaraynta hawlaha ganacsiga oo hoosaysa
- Bangiyo maal-gelineed iyo amaah iyo ganacsi oo aan jirin
- Dowladda dhexe (Puntland) iyo hay'adaha caalamiga ah kuna aaddanaa taakulaynta iyo xoojinta dhaqaalaha oo maqan
- Deeq-bixiyaasha oo ka gaabiyey fulinta mashaariic wax ka tarta horumarinta dhaqaalaha

Sababaha kor lagu soo carrabaabay ayaa kallifay dhaqaale-xumida degmada, arrintaas oo u baahan in fiiro gaar ah la siiyo lana asiibo helitaanka tabo iyo istaraateejiyad lagu maareeyo.

## 1.6 Kaabayaasha dhaqaalaha ee degmada Qardho (Infrastructure)

### 1.6.1 Jidadka

Iyadoo sida la wada ogsoon yahay ay jidadku yihiin kaabaha ugu muhimsan ee ee horumarka lagu gaaro, waxaa degmada Qardho ka jira ciriiri la xiriiira kaabahaas ahmiyadda ballaaran.

Waxaa magaalada Qardho iyo tuulooyinka hoos yimaada qaarkood dhex mara jidka dheer ee laamiga ah kaas oo Qardho ku xira magaaloyinka Boosaaso, Garowe iyo Gaalkacyo.

Qaybta jidkaan Qardho kaga aaddan sida qaybihiisa kaleba waxaa goobo badan ka jira burbur iyadoo aan in muddo ah lagu samayn dayactir.



*Figure 13 Burburka Laamiga*

Inkasta oo ay arrintaasi jirto haddana wuxuu jidkani goor kasta ahaanayaa halbowle macne weyn iyo qiimo badan Qardho ugu fadhiya.

Magaalada Qardho waxaa dhexmara jidad carro ah oo isku xira qaybaha kala duwan ee xaafadaha iyo guud ahaanba magaalada.

Jidadkani waxay u baahan yihiin wax-qabad ballaaran oo isugu jira dhismo, ballaarin, bannayn, dayactir joogto ah mid mid marxaladaysan.

Tuulooyinka iyo degaamada Qardho hoos yimaada waxaa mara jidad carro ah oo waxtar weyn u leh bulshada miyiga. Jidadkani badanaa xilliyada roobabka waa xirman, maadaama aan, dowladda iyo hay'adaha qaabilsani wax ka qaban.



*Figure 14 Ololaha lagu Bannaynayo Jidadka laguna hagaajinyo*

Waxaa magaalada Qardho ku yaal gego dayaaradeed oo qadiim ah jiritankeeduna ku siman yahay xilligii gumeysiga.

Intii ka dambeysey burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya, gegada Qardho lagu ma samayn wax haba yaraatee dayactir ama horumarin ah.

Xilligaan la joogo gegedo ma shaqayso, inkastoo haddii la hawlgeliyo ay kaalin weyn ka qaadan lahayd isgaarsiinta iyo kobcinta dhaqaalaha degmada.

Gegadaan oo la hagaajiyo waxay noqon lahayd barta dibadda looga dhoofiyo kalluunka iyo faleenka waxaana toos ugu soo xirmi lahaa wax-soosaarka xeebaha ee degamada gobolka Karkaar, ka sokow dhoofinta hilibka qalan maadaama ay degmada Qardho hodan ku tahay xoolaha nool.

### 1.6.2 Isgaarsiinta

Isgaarsiintu waxay ka mid tahay kaabayaasha laga ma maarmaanka u ah horumarinta sida weyna ay bulshadu ugu baahan tahay.

Waxaa magaalada Qardho kaga hawl jira shirkadaha isgaarsiinta ee kala ah:

- Golis, iyo
- Telcom Puntland

Shirkadahani waxay fidiyaan adeegyo isgaarsiineed oo casri ah sida taleefan, internet iwm, waxayna xubnaha bulshada magaalada Qardho u suurta geliyeen in la hanto adeegsiga tecnooloojiyada cusub ee macluumaadka.

Waxay kaloo shirkadahani kaalin ka galeen arrimaha shaqaalaynta, iyadoo sida la ogsoon yahay ay shaqo la'aantu ka mid tahay balse ugu horrayso dhibaatooyinka Qardho ka jira.



Figure 15 Xarumaha shirkadaha Telefoonada

### 1.6.3 Adeegga Biyaha Degmadda Qardho:

Iyadoo laga wada dheregsan yahay in biyuhu yihiin tiirka ugu muhimsan ee nolasha aadanaha iyo noolaha kaleba ayey Qardho ciriiri weyn iyo baahi xad-dhaaf ah kaga jirtaa kaabahaas ahmiyadda ballaaran.

Biyuhu waxay kaloo laga ma maarmaan u yihiin caafimaadka guud, wax-soosaarka iyo guud ahaan horumarinta dhinacyada kala duwan ee bulshada.



Qardho waxaa ku yaal 5 ceel oo dhaadheer iyadoo ay 4 ka mid ahi magaalada ku yaaliin, halka uu kan 5-aadna miyiga ku yaal.

Wax-soo-saarka ceelashadani aad ayuu u hooseeyaa mana aha mid looga fadhiyo inuu baahida bulshada degaanka daboolo.

Dhibaataada biyaha la xiriirta ee degaanka Qardho ku negaaddey waxaa loo sababaynayaa:

- Tirada ceelasha dhaadheer oo aad u yar oo aan sinnaba xataa magaalada oo keliya u dabooli karin
- Iyadoo aan la helin maal-gelyeyaal fuliya qodista ceelasha loo baahan yahay
- Dowladda oo aan qoondayn maaliyad lagu qodo ceelal cusub ama lagu dayactiro kuwa jira
- Agabka ceelasha hadda ku hawl jira oo duugoobey
- Dayactir nidaamsan oo aan jirin
- Maamulka ceelasha oo aan lahayn jiritaan waara
- Xaaladda topograafikada iyo tan jiyooloojiyadeed oo leh dabeecad gaar ah
- Iyadoo uusan jirin kayd biyood oo loo irkado markay xaalado qallafsani soo gudboonaadaan
- Tayada biyaha oo aan la isku hallayn karin, maadaama ayan jirin sheybaarro tayada biyaha lagu hubiyo.
- Maqnaanshaha qorshe magaalayn oo ka mid ah arrimaha cuslaynaya biyo-gelinta magaalada

Iyadoo la taabbagelinayo siyaasadda dowladda ee horumarinta biyaha waxaa la jideeyey ku dhaqanka hannaanka isku-dhafka ah ee maamulka biyaha.

Siyaasaddani waxay sugaysaa in biyuhu yihiin milkiyad caam ah, iyadoo la dhiirri gelinayo in maamulka iyo dayactirka kaabaha biyaha lagu aamino shirkado gaar ah.

Masaafada dhuumaha biyaha ee magaaladu waa 27 km, iyadoo ay ilaa iyo hadda biyo-gelinta ka faa'ideysteen oo keliya 1,200 oo guri, taasoo u dhiganta 18.20 % markii loo fiiriyo baahida xilligaan jirta, ka sokow habka ay magaaladu u fidayso oo baahida si joogto ah sare ugu qaadata.

Maaraynta hawlaha biyaha Qardho waxaa gacanta ku haysa shirkadda gaar ahaaneed ee Hodman.

Waxaa magaalada kaga hawl jira shirkado biyo-sifayn kuwaa oo kaalin aan mug badnayn kaga jira helitaanka biyaha cabbidda gala.



*Figure 16 Xarunta Biyaha Degmada*

Tuulooyinka iyo dhulka miyiga ah ee degmada Qardho waxaa laga isticmaalaa qiyaastii 800 oo berkadood, maadaama ayan degaamadaas ceelal ka jirin, bulshada ku noolina ay xoolo dhaqato yihiin.

Sida la ogsoon yahay inkastoo baahida berkadaha loo qabaa ay tahay mid jirta oo aan la iska indho saabi karin, haddana dhanka kalena la is ka ma maahin karo dhibaata ay berkaduhu u leeyihiin deegaanka iyo caafimaadka guud, iyadoo ay weheliso dowlada ay xaalufinta ku leeyihiin.

Tuulada Kubo oo degaan iyo dhul-beereed isugu jirta waxaa laga cabbaa beerahana laga waraabiyaa ceelal gacan lagu qodo iyadoo ay awoodda biyuhu ku xiran tahay mugga biyaha roobabka.

Iyadoo ayan degmada Qardho lahayn ilo biyood oo joogto ah isla markaana dabooli kara baahida dadka, xoolaha iyo beeraha, waxaa si daba-joog ah soo wajaha abaaro iyo biyo la'aan iyadoo marar badan lagu dhaqaaqo biyo-dhaamin iyo gurmada xaaladdaas lagu la tacaalayo.



*Figure 17 Ceelasha oo ay xoolo ka cabbayaan*

### Shaxda heerka biyaha la'aanta ee xaafadaha

Lam.	Magaca Xaafadda	Heerka La'aanta %	Biyaha Baraha (kiosks)	biyaha
1.	Xingood Sare	40%		
2.	Wadajir	40%	1 kiosk	
3.	Qoryacad	35%		
4.	Xorgoble	35%		
5.	Kaambo	50%		
6.	Gacanlibaax	25%	1 kiosk (aan shaqeyn)	
7.	Kubo	85%		
8.	Shimbirale	30%	1 kiosk (aan shaqeyn)	
9.	Xingood hoose	15%	1 kiosk	

Table 11 Heerka biyo la'aanta Isha xogta: PSWEN

#### 1.6.4 Adeegga korontada

Korontadu waxay ka mid tahay kaabayaasha laga ma maarmaanka u ah nololsha dadka, wax-soo-saarka iyo guud ahaan horumarinta.

Waxaa Qardho ku yaal saldhig weyn oo koronto, iyadoo ay ka hawlgalaan farsamo-yaqaanno iyo shaqaale hawlaha korontada aqoon xirfadeed iyo waayo-aragnimo u leh.

Saldhiggani waa hanti qaran wuxuuna ka haray oo laga dhaxlay dowladdii dhexe ee Soomaaliya, iyadoo sanadkii 1988 lagu dhisay iskaashiga wakaaladdii xoogga korontada ummadda iyo hay'adda deeq-bixinta ee dalka Denmark (DANIDA).

Waxaa xusid mudan in halka ay saldhigyadii kale ee dalku baaba'een oo aan maanta raad laga hayn ay saldhigyada Qardho iyo Boosaaso yihiin kuwa keliya oo sidii u jira una shaqaynaya.

Waxay ku jirtaa in la xuso:

- Magaalada Qardho waxaa korontada la helaa 20 saac maalintii
- Waxaa korontada laga isticmaalaa 2,632 daar

- Qiimaha 1 kw waa 0.70 \$ oo u dhigaqnta Sh.so. 23,000.00

#### Heerka Koronto Gelinta Xaafadaha Magaalada

Lam.	Magaca Xaafada	Heerka Koronta la'aanta %
10.	Xingood Sare	40%
11.	Wadajir	40%
12.	Qoryacad	35%
13.	Xorgoble	35%
14.	Kaambo	50%
15.	Gacanlibaax	25%
16.	Kubo	85%
17.	Shimbiraale	30%
18.	Xingood hoose	15%

Table 12 Heerka Koronto gelinta *Isha xogta: WXKU-Qardho*

#### 1.6.5 Caqabadaha adeegga korontada ee degmada:

- Matoorrada saldhigga oo gaboobey, iyadoo haddana muddo 20 sano ku dhow aan loo helin qalab dayactir.
- Iyadoo muddadaas dheer aan saldhigga lagu kordhin dab-dhaliyeyaal cusub
- Dowladda oo aan taageero maaliyadeed saldhigga u fidin
- Iyadoo aan la helin maal-gashi lagu horumariyo saldhigga, korna loogu qaado awoodda wax-soo-saar
- Deeqbixiyeyaasha iyo hay'adaha caalamiga ah oo aan taageero dhan maaliyadeed iyo farsamo toona u fidin saldhigga
- Korontaynta oo aan dabooli karin khadadka magaalada taasoo si weyn oo dardar leh u fidaysa, maadaama ay awoodda saldhiggu xaddidan tahay.
- Magaalada oo aan qorshe magaaleyn lahayn.

- Xoojiyeyaasha oo gaboobey iyadoo loo baahan yahay helitaanka kuwa cusub.



Figure 18 Xarunta korontada EENE Qardho

### 1.6.6 Idaacadaha iyo wargeysyada ka howl gala Dedmada Qardho

Magaca	Nooca	Luqadda	Waqtiga ay hadasho
Daljir	Idaacad	Somali	Maalin kasta
SBC	Idaacad	Somali	Maalin kasta
Idacadda qraanka	Idaacad	Somali	Maalin kasta

Table 13 Idaacadaha ka jira degmada Isha warka : Dawladda hoose

### 1.6.7 Khayraadka Dabiiciga ah

Eebbe wuxuu degmada Qardho ku mannaystay khayraad dabiici ah oo aan ilaa iyo maanta la taabin lana hanan tabihii loo manafacaadsan lahaa hodontinnimadaas uu Alle bulshada u sakhiray.

Buuraha, doxooyinka, togagga, kaymaha, xoolaha nool, duur-joogta, cimilada wanaagsan, dhul-beereedka, xijiyada, macdanta kala duwan, goobaha dalxiiska ku habboon iwm waxay horumarka iyo nolosha dadka u leeyihiin ahmiyad weyn iyo waxtar ballaaran haddii ka faa'ideysigooda loo tafa-xeyto.

Waxay degmada Qardho caan ku tahay dhul baaxad weyn oo daaqsimada aad ugu wanaagsan, inkastoo sababo badan oo aan qaarkood la garaysan karin loo tirinayo inaan dhulkaas sidii ku habboonayd loo manafacaadsan.

Maadaama ay xoolaha nooli yihiin tiirka ay nolosha iyo dhaqaalaha degmadu cuskan yihiin wuxuu burburka deegaanku sababay dhibaatooyin aan la koobi karin oo reer guuraaga iyo guud ahaanba nolosha bulshada si daran u saameeyey.

Waxaa si urursan laga tilmaami karaa:

1. Xirmooyin sharci-darro ah oo dhulka daaqsinka laga samaystay
2. Nidaam iyo farsamo biyaha roobabka iyo daadadka lagu maareeyo oo aan la hanan (biyo-xireenno, waro iwm)
3. Awood sharci-fulineed oo xirmooyinka, dhir-jaridda iyo degaameynta lagu la dagaallamo oo aan jirin
4. Wacyi-gelinta ku aaddan ilaalinta deegaanka oo aan si nidaamsan oo taxan looga hawlgelin
5. Mashaariic miyiga lagu hormariyo oo aan jirin, sida xeryaha xoolo-naaxinta, horumarinta hawlaha iyo wax-soo-saarka xijiyada
6. Xirfadaha xoolo-dhaqashada oo dambeeya
7. Maalgelin lagu hormarinayo dhaqaalaha miyiga oo aan jirin
8. Fursado iyo goobo shaqo lagu abuurayo oo aan miyiga laga fulin
9. Dhul-beerashada oo si aad ah looga gaabiyey

Sida silloon ee dhulka daaqsimada loogu tagrifalay, dhir-jaridda iyo xaalufintu waxay soo jiiddeen saboolnimo iyo hoos-u-dhac dhaqaale, arrintaas oo haddii aan la dabrin loona seeto dheereeyo ay hubaal tahay inay xaalad aan la mahadini soo fool leedahay.

Degmada Qardho waxay leedahay dhul beerashada ku fiican oo haddii biyo loo helo, dadkuna dhaqan iyo xirfado beereed yeeshaan ay hubaal tahay in laga soo saari karo qudaar iyo dalagyo sida meseggada, digirta, geed-miroodka iwm.

Dayaca dhulka loo geystey, degaameynta iyo bohollada maalinba maalinta ka dambaysa sii fidaya iyo iimaha kale ee deegaanka saameeyey waxay saadaalinayaan cawaaqib-xumo bulshada miyi iyo magaalaba soo wajahi doonta.



*Figure 19 Xirmo-cawseed*

### **1.7 Fursadaha Koritaanka Dhaqaale ee degmada Qardho.**

Dabeecadda deegaan, cimilada, meel-dhaca juqraafi, khayraadka uu Eebbe ku mannaystay iyo arrimo badan oo kale waxay u hiilinayaan in Degmada Qardho ay horumar u saan-qaadi karto.

Si arrintan looga dhabeeyo waxaa laga ma maarmaan ah in dadaal, qorshe hawlgal iyo aragti muddo dheer ku aaddan la la yimaado.

Fursadaha suurtagelin kara in himiladaas la taabo waxaa lagu soo ururin karaa:

01. Meel-dhaca juqraafi ee ahmiyadda ballaaran
02. Cimilada wanaagsan ee ay degmooyin badan kaga duwan tahay
03. Cudud shaqaale oo jaban
04. Dhul daaqsimada aad ugu wanaagsan oo xeryo xoolo-naaxin iyo mashaariic la xiriirta laga samayn karo
05. Dhul ballaaran oo beerashada ku habboon
06. Xoolo fara badan, xijiyo iyo khayraad kale oo laga faa'ideysan karo
07. Jidka laamiga ah oo ah furaha horumarinta
08. Xilliga xagaaga oo dhaqaale badani soo gelayo dadka faraha badan oo kulka ka soo hayaamaya awgood
09. Fursado soo jiidan kara shirkadaha maal-gashiga iyadoo loo fidin karo tas-hiilaad lagu dhiirrigelinayo
10. Degaanka oo ku fiican maaraynta amniga & xallinta khilaafaadka
11. Maamul-wanaag, jawi wada-shaqayn oo ka dhexeeya dhammaan mas'uuliinta maamulka degmada
12. Bulshada degmada oo dhaqan la -noolaansho leh
13. Tuulooyinka oo ay guddiyo ka arrimiyaa ka jiraan
14. Maamulka degmada oo xiriir wanaagsan iyo wada-shaqayn la leh bulshada, dowladda, hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah

#### **1.7.1 Arrimaha amniga garsoorka & xabsiga**

Markii la garab dhigo degmooyinka kale ee Puntland, waxaa Qardho loo aqoonsan yahay meel ay nabad-gelyadu aad u wanaagsan tahay.

Amiga dadweynuhu waa sugan yahay, waxaana xaqiijintiisa si joogto ah ugu hawlan ciidanka amniga iyo odayaasha dhaqanka



*Figure 20 Odayaasha Degaanka & arrimaha nabadaynta*

Dembiyadu degmada ka dhacaa waxay isugu jiraan tuugannimo, khilaafaad dhul, arrimo qaad ku lug leh iyo falal dil oo aan badnayn.

Waxaa magaalada ku yaal saldhig boolis oo weyn oo uu xilligii gumeysiga Talyaanigu dhisay. Dhismahaan oo ah mid gaboobey wuxuu u baahan yahay dib-u-dhis iyo qaybo cusub oo lagu kordhiyo.



*Figure 21 Saldhiga Booliska Degmada*

Magaaladu waxay leedahay xabsi weyn oo cusub kaasoo dhawaan la dhisay ayna iska kaashadeen dowladda Puntland iyo hay'adda UNDP-ROLS, iyadoo ay dowladda hoose ee Qardho bixisay dhul baaxad weyn oo mashruuca xabsiga laga fuliyey.

Waxaa sidoo kale Qardho ku taal maxkamad lagu fuliyo hawlaha garsoorka.



*Figure 22 Maxkamada Gobolka & Degmada*

Dhibaatooyinka arrimaha amniga ku lug leh waxaa laga tilmaami karaa oo ugu waaweyn:

01. Saldhigga booliska oo u baahan dayactir culus iyo ballaarin
02. Xubnaha ciidanka amniga iyo asluubta oo tiro ahaan yar isla markaana tababarro xirfadeed oo hawlhooda la xiriira aan helin



03. Mushaarka oo aan dabooli karin maciishadda xubnaha ciidanka booliska, asluubta iyo qoysaskooda
04. Kaabayaasha looga baahan yahay hawlgallada ciidamada booliska iyo asluubta ee degmada oo ciriiri ah
05. Xubnaha ciidamada degmada oo aan heli daryeelka ay u baahan yihiin
06. Xabsiga degmada oo ay ku soo dhowaadeen dhismayaal gaar loo leeyahay, taasoo waxyeelo ku ah amniga xabsiga iyo maxaabiista
07. Hawl-wadeennada maxkamadda oo aan helin tababarro ku filan lana xiriiira hawlaha garsoorka
08. Dadka laga tirada badan yahay oo aan qareemo daafaca helin markii dacwad lagu soo oogo
09. Maxaabiista oo aan la siin tababarro xirfadeed oo ay markay xabsiga ka soo baxaan ku shaqaystaan si ay bulshada dib ugu soo biiraan iyagoo dhaqan ahaan fayow



Figure 23 Xabsiga gobolka Karkaar

### 1.7.2 Wax-qabadka dowladda hoose & mashaariicdii la fuliyey

#### Qeybo ka mid ah

laga soo bilaabo December 2005 oo ah xilligii golaha degaanka la dhisay, dowladda hoose waxay fulisey barnaamijyo iyo mashaariic badan oo kala duwan, kuwaas oo ahmiyad iyo waxtar u leh bulshada degaanka Qardho.

Mashaariicda oo isugu jirta adeegyo iyo kaabayaal waxaa fulintooda iska kaashaday dowladda hoose, dowladda Puntland, hay'ado & ururro calami ah iyo jaaliyadaha dibadda.

Mashaariicda degmada laga fuliyey waxaa laga xusi karaa:

No.	Magaca mashruuca	Nooca shaqada	Cidda fulisey &	Taariikhda la fuliyey
1.	Suuq ganacsiga xoolaha	Dhismo cusub	Dowladda hoose	2004
2.	Suuqa hilibka	Dib-u-dhis	Dowladda hoose , UNHCR Somalia	2003

3.	Suuqa khudaarta	Dhismo cusub	D/hoose, UNDP/PRIDP	2005
4.	Suuqa badeecadaha aan raashinka ahayn	Dhismo cusub	D/hoose, UNDP	2005
5.	Suuq-yaraha haweenka	Dhismo cusub	D/hoose	2006
6.	Xafiiska caafimaadka	Dhismo cusub	Save the Children	2007
7.	Xarunta dowladda hoose	Dayactir & qaybo cusub	D/hoose & UN-Habitat	2008
8.	Xafiiska waxbarashada gobolka	Dayactir & Dib-u-dhis	D/hoose, Save the Children UK	2007
9.	Isbitaalka weyn	Dib-u-dhis	D/hoose, Bisha Cas	2006
10.	Isbitaalka Weyn	Balaarin	Dadweynaha, Maamulk cisbitaalka, Jaaliyada, & D/Hoose	2007
11.	Isbitaalka Weyn	Balaarin	Save the Children D/H	2007
12.	Dugsi hoose & sare	13 Dayactir 7 qaybo cusub	UNICEF, Save the children UK	2006-2008
13.	WC/ bar caafimaad	3 Dayactir 6 qaybo cusub	Municipality, SC.UK, AAH	2005-2008
14.	Boreholes infrastructure	Hagaajin qalab & qalab dayactir	UNICEF Somalia, Shirkadda biyaha HODMAN	2006
15.	Ceel la qoday Kubo	cusub	D/hoose , Islamic Relief	2007
16.	Ceel la qoday	Xogoble	D/H, UNDP	2008
17.	Garoonka kubbadda cagta	Cusub	D/hoose, UNICEF	2006
18.	Xabsiga	Dhismo cusub	UNDP/ ROLS	2006
19.	Suuqa kalluunka	Dhismo cusub	Care International	2007
20.	Dugsi-hoyga gabdhaha	Dhismo cusub	DIAKONIA Sweden	2008

21.	Xerada xanaanada dhirta	Dhisme Cusub	D/hoose UNDP	2008
22.	Xarunta TB	Dayctir & Balaarin	D/hoose, isbitaalka guud ee Qardho	2007
23.	Maxkamadda Qardho	Dayactir	DIAKONIA	2005
24.	Xarunta xirfadaha haweenka Garwonet ee	Dayactir, qaybo cusub	D/hoose, DIAKONA	2006
25.	Xarunta xirfadaha haweenka Garwonet ee	Balaarin	D/H Save the Children	2009
26.	Bangiga Qardho	Dayactir	Dowladda Puntland	2007
27.	Dhireyn Magaalada	Dhireyn	DIAKONA D/H	2007
28.	Bangiga Qardho	Dhisme Guriga	Dowlada Puntland	2007
29.	Qardho Technical Institute	Dayactir	Qardho Municipality, UNCHR	2007
30.	Dhiraynta magaalada Qardho	Dhireyn	D/hoose, UNDP	2007
31.	Xafiiska maaliyadda w.	Dayactir & Dib-u-dhis	Puntland Government	2006
32.	S. G. yaryar ee haweenka	Dhismo cusub	D/hoose, UNDP	2006
33.	Qardho Slaughter hoose	Dhismo cusub	D/hoose, UN-HABITAT	2007
34.	Suuq Xafadeed G-libaax	Dhisme	Care International, D/H	2008
35.	Beerta Magaalada	Xirmeyn	D/hoose	2007
36.	Beerta magaalada	Xirmeyn	D/hoose, Towfiiq	2008
37.	H Post Shimbiraale	Dhisme	Care International	2006

38.	MCH Degmada	Dayactir	Bisha Cas	2007
39.	H Post Xingood	Dhisme	Care International	2007
40.	H-Post Adisoone	Dayactir	AAH	2008
41.	H Post Guud-cad	Dayactir	AAH	2008
42.	H-Post Cambaarsare	Dayactir	AAH	2008
43.	H Post Jedad	Dayactir	AAH	2008
44.	Xabaareer	Dayactir	AAH	2008
45.	H Post Yaka	Dhisme	Save the Children	2008
46.	H Post Shaxda	Dhisme	Save the Children	2008
47.	H-Post Libaax- xar	Dhisme	DRC	2009
48.	H Post Kubo	Dhisme	DRC	2009
49.	H Post Shire	Dhisme	DRC	2009
50.	Dugsiga Al- Xanaan	Dayactir	Save the Children	2007
51.	Dugsiga Xaaji Adan	Balaarin	MercyCorps	2009
52.	Dugsiga Al- Nawaawi G/lib	Dhisme	UNICEF	2007
53.	Dugsiga IDPs	Dhisme	Save the Children	2009
54.	Dugsiga Qardho	Dhisme	Jaaliyada R-Qardho	2009
55.	Xarunta Haweenka	Dhisme	UNICEF	2009
56.	Dugsiga Al- Azhar	Dayactir	Save the Children	2008
57.	Dugsiga Wadaniya	Daycatir	Save the Children	2007
58.	Dugsiga Kubo	Balaarin	Save the Children Mic	2009
59.	Dugsiga Yaka	Dhisme	Save the Children	2009

60.	Dugsiga Dhaxan	Dhisme	MercyCorps	2009
61.	Dugsiga Cambaarsare	Dhisme	MercyCorps	2009
62.	Dugsiga Mopil Guda	Dhisme	MercyCorps	2009
63.	Dugsiga Mopil Geri-hel	Dhisme	MercyCorps	2009
64.	Dugsiga Muntada	Balaarin	Maamulka Dugsiga	2009
65.	Dugsiga Al- Nawaawi	Balaarin	MercyCorps	2009
66.	Xarunta Caanaha Shire	Dhisme	VSF Germany	2008
67.	Xarunta Caanaha Yaka	Dhisme	VSF Germany	2008
68.	Xarunta Caanaha Sanjilbo	Dhisme	VSF Germany	2008
69.	Xarunta Caanaha Xabaar-reer	Dhisme	VSF Germany	2008
70.	Danyarta Saameysay Abaarta	Dakhli abuur	OXfom	2005
71.	Danyarta degan magalada	Dakhli abuur	Save the children	2007
72.	Danyarta dumarka suuqleyda	Dakhli abuur	OTP, Nedreland	2007
73.	Dumar suuqleyda G/libax	Dakhli abuur	Care International	2007

Table 14 Mashaariicdii ka hirgelay degmada Xogta: Dawlada Hoose Qardho

### 3.1 BAAHIYAHA IYO MUDNAANTA HEER QARAN (NATIONAL LINE MINISTRY REQUIREMENTS)

Degmada Qardho waxay ka hawlgeleysaa fulinta siyaasadda ka turjumeysa fulinta himilooyinka horumarinta wasaaradaha dowladda dhexe ee ku aaddan dhinacyada adeegyada bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha, sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, tamarta, waddooyinka, ganacsiga, nabadgelyada, deegaanka, xoolaha, iyo beeraha.

Si taas loo hirgeliyo intii la diyaarinayey Qaabka horumarinta Degmada Qardho waxaa xohayaha fulinta iyo madaxda waaxyaha dowladda hoose oo kaashanaya wasaaradda arrimaha gudaha, D-ha/ hoose iyo HRM soo diyaariyeen siyaasadda iyo qorshaha heer qaran ee la xiriira waxqabadka ku aaddan baahiyaha heer degmo si laysu waafajiyo wada shaqaynta dowladda hoose iyo dowladda dhexe.

Degmadu waxay kaloo sugaysaa in ay raacdo shuruudaha ay dowladda dhexe u dejiyey bixinta cashuuraha adeegyada la xiriira sida ceel biyood, dugsi, xarun caafimaad, suuqyo, xarun bulsho, fayadhowr iwm.

Shuruudahaasi waxay si faahfaahsan ugu xusan yihiin dokumantiyada siyaasadda waxqabad ee heer qaran waana sidatan:

#### 2.2 Waxbarashada

Ujeeddada waxbarashadu laga leeyahay waa:

- In la baahiyo aqoonta si loo asteeyo bulsho hanan karta hawlaha iyo barnaamijyada horumarinta dhinacyada kala duwan ee nolosha
- In waxbarashadu noqoto mid waafaqsan dhaqanka iyo qawaanininta islaamiga ah lana
- In jahliga la la diriro lana adeegsado siyaasad dhiirrigelineyas adeegsiga tiknoolojiyadda cusub
- In laga hawlgalo tayeynta waxbarashada
- In manaahijta la mideeyo

Sharciga waxbarashada ee dawladdu wuxuu jideynayaa:

1. In tirada ardayda dhigata waxbarashada asaasiga ah ee ay da'doodu 6-14 u dhexeyso la gaarsiiyo 50% sanadku markuu yahay 2014.
2. Kordhinta gabdhaha dhigata waxbarashada asaasiga ah oo qiyaastii hadda dhan 36% iyadoo tiradaas la gaarsiinayo 50% sanadka 2014.
3. Kordhinta carruurta reer guuraaga iyadoo tirada ardayda dugsiyada dhigata sanadka 2014 la gaarsiinayo 25%.

4. In dhismo dugsi loo qoondeeyo dhul u qalma baaxad ahaanna aan ka yarayn 40x40m (1,600 Sq m)
5. Goobta dugsi laga dhisayaa waa inay tahay meel ay baahi waxbarasho ka jirto, halkii fasal ee 1.aadna loo heli karaa ugu yaraan 25 arday sanad kasta
6. Bulshada ku nool degaanka dugsi laga dhisayo waa inay ka qayb qaadataa hawlaha dugsiga taasoo dhan kalena ku abuuraysa dareenka lahaanshaha (ownership)
7. Dhulka dugsi laga dhisayaa waa inuu yahay mid caam ah (public) oo ayan milkiyad gaar ahi ku jirin
8. Dugsi kasta waa inuu guddi waalidiin ka jiraa.

### **2.3 Caafimaadka:**

Ujeeddada siyaasadda caafimaadku waa helitaanka adeeg caafimaad oo leh jiritaan waara oo ay kaabayaashu u dhan yihiin iyadoo:

- La sugayo in dadku si fudud u helaan adeeg caafimaad oo tayeysan
- Laga hawlgelayo hoos-u-dhigidda dhimashada hooyada iyo ilmaha ay da'doodu 5 sano ka yar tahay
- La la dirirayo cudurrada halista ah ee faafa sida HIV AIDs, TB
- In adeegga caafimaad ee dadweynaha loo fidinayo uu noqdo mid ay dhaqaale ahaan awoodi karaan
- Laga hawlgelayo iskaashiga dowladda, deeq-bixiyaasha, hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah kuna saabsan fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda caafimaadka
- La dhiirri-gelinayo maal-gashiga waddaniga ah iyo kan shisheeye ee mashaariicda caafimaadka la xiriira
- La xoojinayo lana tayeynayo barnaamij joogto ah lana xiriira wacyigelinta dadweynaha oo caafimaadka ku saabsan

### **2.4 Hawlaha guud iyo kaabayaasha**

#### **2.4.1 Jidadka iyo gegooyinka dayaaradaha**

Siyaasadda dowladdu waxay ku salaysan tahay astaynta barnaamij iyo qorshe meelmar ah oo lagu horumariyo kaabayaasha dhaqaale iyadoo:

- La dejinayo barnaamij ku saabsan dayactirka joogtada ah iyo kan marxaladaysan ee jidadka jira. Xaafadaha magalada dhexdeeda oo dhan

- Laga hawlgelayo dhismaha jidad cusub iyadoo gaar ahaan fiiro loo leeyahay goobaha wax-soo-saarka miyiga, xeebaha iyo degaamada durugsan ee go'doonka ah
- La meelmarinayo qorshe la xiriira dayactirka iyo horumarinta gegooyinka dayaaradaha

## 2.5 Korontada

Maadaama ay korontadu tahay aalad aad u muhim ah marka laga hadlayo himilo ku aaddan horumarinta dhaqaale iyo bulsho, waxay siyaasadda dowladdu fiiro iyo tixgelin gaar ah siinaysaa kaabahaas ahmiyadda ballaaran.

Siyaasadda arrintan la xiriirtaa waxay sugaysaa:

- Dayactirka iyo sare u qaadista awoodda wax-soo-saar ee saldhigyada korontada ee haatan jira
- Ku fidinta awoodda korontada degmooyinka ka qatan, iyadoo laga raacinaayo wadada dheer labadeed dhinac Tuulooyinka Yaka iyo Guud-cad
- Ka hawlgalka baadi-goobka taageerada maaliyadeed iyo kaalmada farsamo ee looga baahan yahay horumarinta iyo fulinta mashaariicda korontaynta, iyadoo la la kaashanayo deeq-bixiyaasha
- Dhiirrigelinta maal-gashiga ku saabsan mashaariicda korontada iyadoo la kasbayo maal-gashiga waddaniga ah iyo kan shisheeye
- Ka hawlgalka adeegsiga tabarta dabaysha iyo qorraxda

## 2.6 Biyaha

Dowladdu iyadoo aqoonsan ahmiyadda ay biyuhu leeyihiin, isla markaana garowsan baahida loo qabo horumarinta maaraynta biyaha waxay sharciga biyaha (water law) ku jideysey:

1. Ilaalinta tayada iyo nadaafadda biyaha si waafaqsan shuruudaha iyo tilmaamooyinka uu sharcigu tilmaamayo
2. Ilaalinta sedka iyo kaalinta ay dadka tabarta yari biyaha ku leeyihiin (dumarka, carruurta iwm)
3. Fulinta mashaariic biyood oo leh jiritaan waara, iyadoo la la kaashanayo deeq-bixiyaasha & hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah
4. Maaraynta biyaha roobabka iyo daadadka iyadoo la fulinayo mashaariic biyo-xireenno iyo waro
5. Dhiirrigelinta maalgashiga gaarka ka ah kuna saabsan mashaariicda iyo guud ahaan hawlaha horumarinta biyaha



6. Adeegsiga agabka soo-saarista biyaha oo farsamo ahaan waafaqsan xeerarka iyo shuruudaha caalamiga ah ee arrinta nidaamiya
7. Sugidda helitaanka Joogteysan ee biyaha
8. Siinta fiiro gaar ah baahida biyood ee reer guuraaga xoolo-dhaqatada ah
9. Dhiirrigelinta iskaashiga dowladda iyo shirkadaha gaar ahaaneed ee maaraynta iyo maamulka biyaha
10. Dowladdu waxay xaq u leedahay gacan ku qabashada maamulka biyaha haddii shirkad lagu aaminey ay ku fashilanto hawlihii loo idmay
11. Dowladdu waxay awood u leedahay in ay xirto meel kasta oo biyo laga soo saaro haddii ay caddaato in biyuhu tayo xun yihiin oo ay caafimaadka u daran yihiin
12. Dowladda wuxuu xil ka saaran yahay dhegeysadka iyo wax ka qabashada cabashooyinka dadweynaha ee biyaha la xiriira

## 2.7 Ilaalinta deegaanka

Siyaasadda dowladda ee ilaalinta deegaanku waa aragti looga gol leeyahay ku dhaqanka nidaam, kasmoo iyo xeerar ballan qaadaya ilaalinta deegaanka si loo bedbaadiyo nolosha dadka iyo duunyada, waxayna jideysey:

- In ilaalinta deegaanku noqoto hawl joogto
- Ka hortagga dhir-jaridda iyo xaalufinta deegaanka
- Ka hortagga iyo maaraynta iimaha deegaanka ku saabsan sida bohollada, nabaad-guurka ee burburka deegaanka saameeya
- Ilaalinta iyo ka faa'ideysiga wanaagsan ee khayraadka dabiiciga ah
- Ka hawlgalka iskaashi la la yeesho hay'adaha caalamiga ah kuna saabsan arrimaha deegaanka
- Joojinta iyo maaraynta hawlaha la xiriira degaameynta dhulka daaqsinka
- Dejinta iyo joogteynta wacyi-gelinta bulshada kuna saabsan ilaalinta deegaanka

## 2.8 Xoolaha

Siyaasadda dowladdu waxay astaynaysaa:

- Horumarinta iyo tayeynta xanaanada iyo daaweynta xoolaha

- Sugidda kaabayaasha laga ma maarmaanka u ah horumarinta xoolaha
- Baadi-goobka mashaariicda la xiriirta tayeynta wax-soo-saarka xoolaha
- Gaarsiinta xoolo-dhaqatada adeegyada laga ma maarmaanka ah sida biyaha, daawada iwm
- Baadi-goobka suuqyo xoolaha loo dhoofiyo iyadoo la sugayo danaha xoolo-dhaqatada
- Fulinta barnaamijyo wacyi-gelin oo ku saabsan xanaanada xoolaha
- Ka hawlgalka helitaanka maal-gashi la xiriira xoolaha, sida xeryaha naaxinta iwm
- Fulinta barnaamij la xiriira astaynta kooxo xirfadley ah oo wareega
- Fulinta barnaamij lagu dhisayo macaahid lagu barto xirfadaha xanaanada, naaxinta iyo daaweynta xoolaha
- Ka hawlgalka iskaashi la la yeesho deeq-bixiyaasha iyo hay'adaha caalamiga ah kuna saabsan horumarinta xoolah

## **2.9 Beeraha**

Ujeeddoyinka beeraha ku saabsan ee siyaasadda dowladda ku cayiman waa:

- Dejinta barnaamij dhammaystiran oo lagu horumarinayo beeraha
- Ka faa'ideysiga dhulka beerashada ku fiican iyadoo la adeegsanyo xirfadaha iyo teknooloojiyada laga ma maarmaanka ah
- Astaynta dugsiyo farsamo/macaahid lagu barto cilmiga beeraha si loo helo xirfadlayaal aqoon u leh beeraha
- U fidinta beraleyda taageero iyo kaalmo farsamo si loo tayeeyo wax-soo-saarka
- U jiheynta dhalinyarada hawlaha beeraha si dhanna ay wax-soo-saarka uga qayb qaataan dhan kalena ay shaqo la'aanta iyo saboolnimada uga baxaan
- Dejinta barnaamij wacyi-gelin kuna saabsan beeraha

## **2.10 Horumarinta qoyska iyo haweenka**

Ujeeddada horumarinta haweenka iyo qoyska laga leeyahay waxay nuxur ahaan ku urursan tahay:

- In haweenku helaan xuquuqda waxbarashada, caafimaadka, ganacsiga iyo shaqada,
- In haweenka laga qayb geliyo maamulka, siyaasadda iyo guud ahaan barnaamijyada horumarinta
- In la ilaaliyo xuquuqda iyo xanaanada carruurta
- In la sugo helitaanka hooyada iyo ilamaha xanaanada iyo adeegyada caafimaad ee laga ma maarmaanka ah
- In la xoojiyo wacyi-gelinta la xiriirta horumarinta iyo danaha haweenka

### **2.11 Amniga iyo Caddaaladda**

- Hirgelinta caddaaldda iyo nidaam garsoor oo hufan
- Soo celinta iyo soo noolaynta nidaamka iyo kala dambaynta
- Dayactirka/dhismaha maxkamadaha iyadoo loo dhammaystirayo kaabayaasho shaqo ee laga ma maarmaanka ah
- Tababaridda hawl-wadeennada hay'adaha garsoorka
- Sare u qaadista awoodda, tayada iyo aqoonta xirfadeed ee hay'adaha sharci-fulinta
- Tababaridda ciidanka amniga iyadoo la kafaalo qaadayo maciishaddooda iyo tan qoysaskooda
- Sare u qaadista aqoonta xirfadeed ee ciidanka asluubta
- Dayactirka saldhigyada booliska
- Dayactirka xabsiyada iyadoo loo dhammaystirayo kaabayaasha loo baahan yahay

### **3.1 NATIIJADA LA TASHIGA BULSHADA (COMMUNITY CONSULTATION RESULTS)**

Golaha degaanka degmada Qardho, isagoo ay taageerayaan wasaaradda arrimaha gudaha, D/ha hoose & HRM, ururka maxalliga ah ee TASS wuxuu la tashaday bulshada ku dhaqan 20 xaafadood oo degmada Qardho ka tirsan, iyadoo 8 xaafadood oo ka mid ahi ku yaallaan magaalada Qardho gudaheeda, halka ay 12-ka kalena ay magaalada ka baxsan yihiin. Hawshaan waxaa maalgelisey hay'adda UNICEF.

La-tashiga waxaa looga gol lahaa in la sahamiyo oo la ogaado dhibaatooyinka xaafadaha iyo tuulooyinka ka jira si loo dejiyo qorshe lagu xallinayo kuna aaddan 5-ta sano ee soo socota

La-tashiga waxaa ka soo baxay dhibaatooyinka ay bulshadu ka cabanayso oo kala ah:

#### **3.2 Caafimaadka**

- Dhakhaatiirta iyo agabka caafimaadka oo aad u yar.
- Tuulooyinka iyo dhulka miyiga oo aan helin gargaarka caafimaadka degdegga ah
- Dad badan oo arrimo caafimaad u aada magaaloyin Qardho ka durugsan iyadoo uu ka baxo kharaj ayan awoodi karin
- Ka ma jiraan degmada macaahid lagu barto xirfadaha caafimaadka iyo sheybaarro la isku hallayn karo

#### **3.3 Waxbarashada**

- Macallimiinta dugsiyada oo aan helin tababarro sare loogu qaadayo aqoontooda la xiriira maaddooyinka ay dhigaan
- Manaahijta waxbarashada oo aan midaysnayn
- Ardayda dhammaysata waxbarashada dugsiyada oo aan helin waxbarasho macaahid sare, mid jaamacadeed iyo shaqo toona
- Carruurta ku nool meelaha magaalada ka baxsan oo aan waxbarashada asaasiga ah helin
- Carruurta dadka danyarta ah iyo kuwa qoysaska barakacayaasha oo aan waxbarashada asaasiga ah helin

#### **3.4 Nadaafadda**

- Xeer ku saabsan qashinka iyo faya-dhowrka oo aan jirin
- Qorshe lagu maareeyo ururinta qashinka iyo gaadiid baahidaas dabooli kara oo aan jirin

- Goobaha loogu tala galay in qashinka lagu ururiyo oo aan mugga qashinka qaadi karin
- Xaafadaha ay barakacayaashu ku badan yihiin oo aan suuliyo ku filan lahayn
- Shaqaalaha dowladda hoose ee hawlaha qashinka ku hawlan oo aan tababar helin isla markaana aan helin qalab qashin-ururin oo ku filan

### **3.5 Deegaanka iyo Xoolaha**

- Boholo dhulka daaqsinka ku fiican oo sii fidaya
- Abaaro sababi kara burbur deegaan
- Dhirta la gubayo oo dhuxul iyo xaydaan beero-cawseed loo rogayo
- Reer miyiga oo aan loo dejin barnaamij wacyi-gelin kuna saabsan ilaalinta deegaanka iyo ka hortagga nabaad-guurka
- Biyo la'aan xilliyada jiilaalka
- Dhulkii daaqsinka oo beer-cawseed laga samaystay iyo dhirtii oo la jarayo
- Qiimaha waxyaalaha ay xoolo-dhaqatadu soo saaraan oo hoos u dhacay
- Cudurrada xoolaha oo aan daawo iyo dhakhaatiir loo helin

### **3.6 Biyaha**

- Biyaha oo guud ahaan degmada ku yar, gaar ahaan xilliyada jiilaalka
- Roobabka iyo daadadka oo aan laga faa'ideysan maadaama ayan biyo-xireenno iyo waro jirin
- Biyo-gelinta oo aan xaafadaha magaalada wada gaarin
- Biyaha degmada laga cabbo oo aan nadiif ahayn, iyadoo dhanka kalena ayan jirin sheybaarro tayadooda lagu hubiyo

### **3.7 Waddooyinka**

- Tuulooyinka qaarkood ma leh jidad ay reer miyigu wax-soo-saarkooda soo mariyaan
- Xilliada roobabka oo ay badi jidadka tuulooyinka iyo miyigi go'aan
- Xaafadaha magaalada qaarkood ma leh jidad uu gaadiid mari karo iyadoo qaybo kalena ay waddooyinku xun yihiin
- Jidka laamiga ah ee magaalada Qardho ku xira magaalooyinka Boosaaso iyo garowe oo ay meelo badani burbursan yihiin

### 3.8 Suuqyada iyo xarumaha bulshada

- Dayactir la'aan ka jirta suuqyada khudaarta, caanaha, hilibka iyo goobaha waratada degmada Qardho.
- Suuqa dhexe ee magaalada oo ayan xaafado badan oo magaalada ahi soo gaari karin, iyadoo dhan kalena ayan jirin suuqyo heer xafadeed ah oo ay ka adeegtaan
- Xarumaha bulshadu ku kulanto oo guud ahaan xafadaha magalada Qardho ku yar



Figure 24 Suuqyada weyn ee hadda jira

### 3.9 Baahiyaha ugu waa weyn ee bulshada

- Xaafadaha Wadajir, Shire, Kubo, Qoryacad, Guudcad, Gerihel, iyo Dhaxan oo loo baahan yahay in suuliyo loo sameeyo
- Xaafadaha Shibiraale, Guudcad, Xabaal reer, Gacan libaax, Yaka, Qoryacad, Libow, Jedad, Xingood hoose, Carmo, Kaambo, Shire, Libaaxar iyo Xingood sare oo loo baahan yahay in loo sameeyo goobo qashinka lagu ururiyo iyo suuliyo dadweyne (public)
- In dugsiyo waxbarashada asaasiga ah laga hirgeliyo xaafadaha Dhaxan, Libaaxar, Kubo, Kaambo, Carmo, Jedad iyo Shire
- In xaafadaha Gacan libaax, Xingood sare, Wadajir, Xingood hoose, Libaaxar, Kubo, Kaambo, Guudcad iyo Qoryacad laga dhiso xarumo bulsho
- In la asteeyo meelo biyaha lagu kaydiyo lana dayactiro berkadaha biyaha ee xaafadaha Kubo, Shinbiraale, Qoryacad, Guudcad, Dhaxan, Yaka, Carmo, Shire, Xabaal reer iyo Gerihel
- In sare loo qaado dhaqaalaha dadka saboolka ah loona fidiyo tababarro xirfadeed gaar ahaan kuwa ku nool xaafadaha Gacan libaax, Dhaxan, Gerihel, Jidad, Wadajir, Shire, Xabaal reer, Xingood hoose, Libow, Libaaxar, Kubo, Kaambo, Guudcad iyo Qoryacad

- In xaafadaha Wadajir, Kaambo, Carmo, Jedad, Qoryacad, Libow, Yaka, Gerihel iyo Dhaxan laga dhiso baro caafimaad & MCH-yo
- In xaafadaha Gacan libaax, Xingood sare, Xingood hoose, Wadajir, Kaambo iyo Qoryacad laga sameeyo jidad lana dayactiro kuwa dhex mara
- In magaalada gudaheeda dhirayn lagu sameeyo, xaalufintana laga ilaaliyo xaafadaha Shinbiraale, Guudcad, Qoryacad, Wadajir, Dhaxan, Gerihel, Carmo, Xabaal reer iyo Yaka



Figure 25 Suuqa khudaarta & hilibka

## **4.0 BAAHIYAHA MUDNAANTA LEH EE DEGMADA QARDHO (DISTRICT PRIORITIES)**

### **4.1 Caafimaadka**

- In la sugo helitaanka kaabayaasha caafimaadka guud
- In la dhiso goobo caafimaad oo cusub si sare loogu qaado adeegyada caafimaad

### **4.2 Waxbarashda**

- In kor loo qaado, tababarrada macallimiinta lana siiyo mushahar ku filan.
- In Manhajka wax barashada la mideeyo
- In la asteeyo macaahid waxabarasho iyo farsamo
- In la yareeyo wax qoris-akhris la'aanta lana dhiso dugsiyada waxbarashada dadka waaweyn
- In laga hawlgalo helitaanka dugsiyada wareega (Mobile schools)
- In la dejiyo hab ballan qaadaya in carruurta danyarta iyo barakacayaashu helaan fursadda waxbarashada asaasiga ah
- In kor loo qaado heerka is-diiwaangelinta oo liidata taasoo ay u sabab tahay dhaqaalo yari iyo waxbarashada oo aan la fahamsaneyn gaar ahaan xeryaha qaxootiga
- In tuulooyinka iyo degaamada magaalada ka baxsan loo helo macallimiin

### **4.3 Biyaha**

- In ceelal dhaadheer laga qodo degmada iyo tuulooyinkeeda
- In la helo biyo nadiif ah oo jaban
- In dayactir lagu sameeyo ceelashii hore u jirey
- In baro biyood laga sameeyo magaalada dhexdeeda
- In la kordhiyo mugga haamaha kaydka biyaha



#### 4.4 Nadaafadda



Figure 26 Ololaha Nadaafadda & qashin-ururin

- Goobaha qashin ururinta oo la kordhiyo
- Gaadiidka qashinka iyo shaqaalaha oo la kordhiyo
- Godadka qashinka lagu gubo oo magaalada laga fogeeyo
- Tuulooyinka iyo goobaha barakacayaasha oo suuliyo laga dhiso
- In wacyigelin nadaafadda la xiriirta loo fidiyo bulshada degaanka iyo barakacayaasha
- In la maareeyo daadadka iyo goobaha biyo-fariisadka ee magaalada dhexdeeda ah

#### 4.5 Xoolaha, degaanka, xijiyada iyo beeraha

- In laga hortago xaalufka deegaanka sida boholaha, jaridda & gubidda dhirta iyo degaameynta
- In la joojiyo beer-cawseedyada la xirmaysanayo
- In la wacyi-geliyo lana taageero hay'adaha iyo bulshada ilaalinta iyo wax ka qabashada degaanka ku hawlan
- In xoolaha loo helo daawo iyo dhakhaatiir
- In la helo macaahid lagu bart xannaanada iyo daaweynta xolaha
- In xoolaha loo helo suuq ganacsi oo dammaanad leh
- In xijiyada loo helo waddooyin, biyo, daawo, malgelin iyo suuq dibadeed oo lagu kalsoon yahay
- In la helo abuur tayo leh, qalab , malgelin iyo biyo ku filan beeraha

#### 4.6 Saboolnimada

- In la helo goobo iyo fursado shaqo
- In la abuurto jawi maal-gashi oo lagu astaynayo mashaariic si sare loogu qaado heerka maciishadda loona yareeyo iinta saboolnimada
- In la joojiyo takooridda iyo faquuqa dadka dan yarta ah

#### 4.7 Amniga iyo garsoorka

- In la dayactiro saldhigga booliiska lana dhiso saldhigyo cusub oo heer xaafadeed ah
- In la kordhiyo tirada, tayada iyo agabka ciidanka booliska
- In la sugo dhowrista sharciga iyo kala damaynta
- In la tayeeyo hawlaha garsoorka
- In sare loo qaado aqoonta xirfadeed ee ciidanka asluubta
- In la dayactiro lana ballaariyo suuqyadii hore u jirey lana dhiso suuq dhexe oo cusub ayna dhammaan adeegyada loo baahan u dhan yihiin
- In dayactir lagu sameeyo jidadka hadda jira lana furo waddooyinka magaalada dhexdeeda ah
- In laga hawlgalo diyaarinta mashruuca magaaleynta Qardho iyadoo la la kaashanayo dowladda, deeq-bixiyaasha iyo hay'adaha & xafiisyada ku takhasusay hindisaadda magaaleynta
- In la dejiyo hannaan xarumaha dowladda iyo qaybaha kale ee magaalada lagu kala soocayo
- In la xoojiyo dhiraynta magaalada



Figure 27 Bilicda Beeraha Bartahama Magaalada

### **Aragtida Mustaqbalka Degmada Qardho (Vision)**

In Qardho, degmo iyo magaalaba loo dhammaystiro dhammaan adeegyada bulshadeed, kaabayaasha dhaqaale, magaaleynta iyo sugidda ilaalinta deegaanka iwm kuwaas oo leh jiritaan waara, si sare loogu qaado heerka maciishadda & hannaanka nololeed iyo dhaqan-dhaqaale ee dadweynaha degaanka.

### **Ujeeddada (objective)**

5 sano ee soo aaddan kana bilaabanaysa 2010-ka ujeeddooyinka ay degmadu hiigsaneyso in la gaarana la toogeystey waa:

1. In bulshada Qardho ay hesho adeeg caafimaad oo dhammaystiran iyadoo xaalad kasta oo caafimaad la la tacaalayo in ka yar 2:30 saac
2. In carruurta magaalada iyo tuulooyinku helaan waxbarasho dhammaystiran, iyadoo la astaynayo barnaamijka waxbarashada dadka waaweyn, lana sugayo in danyarta iyo barakacayaashuna helaan fursad waxbarasho
3. In la dejiyo lana fuliyo nidaamka isku-xirka guud ee jidadka magaalada (road network) lana sugo helitaanka jidadka tuulooyinka iyo goobaha kale ee degaamada loo maro
4. In bulshada Qardho ay hesho suuqyo casri ah oo ay adeegyada laga ma maarmaanka ahi u dhan yihiin si sare loogu qaado hannaanka ganacsi
5. In bulshada Qardho loo helo biyo nadiif ah oo tayadooda la xaqiijiyey iyadoo la sugayo in qiimuhu macquul noqdo
6. In inta badan ee dadweynaha degmadu helaan xarumo bulshadeed oo ay ku kulmaan iyo sidoo kale goobaha cibaadada iyo kuwa madadaalada
7. In xaafadaha magaalada iyo tuulooyinku helaan nidaam dhammaystiran oo qashin-ururinta ku saabsan si bilicda loo ilaaliyo loona sugo shuruudaha caafimaadka guud ee la aqoonsan yahhay

8. In la dejiyo barnaamij taxan kuna saabsan hoos-u-dhigidda saboolnimada iyadoo la abuurayo xarumo tababarro xirfadeed, nidaam dakhli abuur (deyn/deeq)
9. In danyarta gacan laga siiyo helitaanka guryo raqiis ah
10. Dejinta barnaamij meelmar ah kuna saabsan xanaanada xoolaha, xoojinta wax-soo-saarka, ilaalinta deegaankka, ka hortagga xalufka, dhir-jaridda iwm

### **Waxqabadka 2010 (interventions)**

#### ***Caafimaadka:***

1. Si loo horumariyo adeegga caafimaadka waxaa lagu tala gelayaa in shanta sano ee soo socata laga hirgeliyo xarumo caafimaad oo leh qalab iyo shaqaale xirfad leh xaafadaha kala ah: Wadajir, Kaambo, Carmo, Qoryacad, Libow, Gerihel, iyo Dhaxan iyadoo isla markaana la ballaarinayo xarunta caafimaadka xaafadda Jedad, tababarna la siinayo shaqaalaha MCHka tuulada Yaka.
2. Waxaa laga hawlgelayaa la-dagaallanka iyo ka hortagga cudurrada faafa sida HIV/AIDS, TB, duumada iwm
3. Waxaa la dejinayaa barnaamij ku aaddan sare u qaadista adeegga caafimaad ee danyarta iyo barakacayaasha

#### ***Waxbarashada***

1. Si loo horumariyo wax barashada waxaa shanta sano ee soo socata laga hirgelinayaa waxbarashada asaasiga ah xaafadaha kala ah: libaaxar, Kubo, Carmo, Kaambo, iyo Wadajir. Xaafadaha Jedad iyo Shire waxaa laga hirgelinayaa dugsi dhexe iyo Dugsi Quraan. Sanadaha 2011 iyo 2012 waxaa laga hirgelin doonaa xarumo waxbarasho ee dadka waaweyn iyo barnaamijka la dagaallanka aqoon darrida xaafadaha kala ah: Xingood Sare, Gacan libaax, Dhaxan, iyo Kubo. Waxaa loo tababarayaa macalimiinta loona qalabeeyo dugsiyada xaafadaha kala ah: Libow, Libaaxar, Yaka iyo Jidad. Waxaa dugsi hooy oo cunto leh xaafadaha Guudcad iyo Jedad

### ***Biyaha iyo Korontada***

Si dadweynaha degmadu u helaan biyo nadiif ah iyo adeeg koronto oo ku filan kuna helaan qiimo macquul ah waxaa laga hirgelin doonaa dayactir berkado tuulooyinka Guudcad, Xabaal Reer iyo Shire waxaana biyo gelin iyo waro biyo qabatin ah laga hirgelin doonaa tuulooyinka kala ah; Shinbiraale, Carmo, Gacan libaax, Dhaxan, Gerihel iyo Qoryacad. Waxaa magaalada gudaheeda iyo tuulooyinka Kubo iyo Yaka laga qodi doonaa ceelal. Waxaa adeeg koronto Laga hirgelin doonaa sanadka 2011 xaafadaha Shinbiraale iyo Xabaal reer

### ***Xoolaha iyo deegaanka***

Si loo ilaaliyo deegaanka loona horumariyo xoolaha nool waxaa laga hirgelinayaa barnaamij ku saabsan ilaallinta deeganka, dhireyn iyo xarumo lagu Daweeyo xoolaha nool sanadka 2012 ilaa 2013 tuulooyinka kala ah: Gudcad, Qoryacad, Wadajir, Dhaxan, Carmo, Shinbiraale, Xabaal reer iyo yako.

### ***Nadaafadda***

Si loo horumariyo nadaafadda degmada waa in Shanta Sano ee soo socata laga hirgeliyaa Godad Qashinka lagu ururiyo iyadoo la tababarayo shaqaalaha ka shaqeeya tuuloyinka kala ah: Xabaal Reer, Gacan libaax, Guudcad, Yako, Qoryacad, Libow, Jidad, Xingood hoose,, Kaambo,, iyo Xingood Sare iyadoo tuulooyinka Shinbiraale, Shire, iyo Carmo laga qodayo suuliy

### ***Jidadka***

- Si ay reer guuraaga iyo guud ahaan bulshada miyiga ugu suurta gasho helitaanka jidad loo mariyo badeecadaha ay u baahan yihiin (biyaha, raashinka, dawooyinka iwm) isla markaana ay suuq-geynta wax-soo-saarkoodu ugu sahlanaato waxaa 5-ta sano ee soo socota tuulooyinka Carmo iyo Xabaal reer laga hirgelinayaa waddooyin si gaarista magaaladu u noqoto mid ka yar 2 saac
- Magaalada dhexdeeda waxaa laga hawlgelayaa hagaajinta waddooyinka iyo bannaynta kuwa xiran.

- Jidaka dheer ee laamiga ah waxaa la dayactirayaa qaybaha degmada kaga aaddan iyadoo la la kaashanayo dowladda iyo hay'adaha wax ka geli kara

### ***Suuqyada***

- Si loo hormariyo nadaafadda korna loogu qaado ganacsiga waa in shanta sano ee soo socata laga hirgeliyaa suuqyo casri ah oo nadiif ah xaafadaha kala ah Shire, Kubo, Qoryacad, Guudcad, Gerihel, Dhaxan, Gacanlibaax, Kubo, Xingood hoose, Xingood sare, iyadoo la dayactirayo suuqii hore ee Wadajir.
- Waxaa bartamaha magaalada laga dhisayaa suuqa weyn ee dhexe oo ay adeegyada laga ma maarmaanka ah iyo kaabayaashuba u dhan yihii kaasoo dowr weyna ka qaadan doona bilicda iyo magaaleynta Qardho

### ***Saboolnimada***

- Si hoos loogu dhigo saboolnimada waxaa shanta sano ee soo socata laga hirgelin doonaa dhaqaale abuuris, deyn bixin, xirfad abuuris, deeq lacageed xaafadaha Gacanlibaax, Dhaxan, Gerihel, Jidad, Wadajir, Shire, Xabaal-reer, Xingood hoose, Libow, Libaaxar, Kubo, Kaambo, Guud-cad iyo Qoryacad iyadoo isla markaana loo dhisayo guryo raqiis ah dadka saboolka ah iyo kuwa uu dakhligoodu xaddidan yahay
- Sidoo kale si saboolimada loo yareeyo waxaa guryo laga dhisi doonaa xaafadaha Shinbiraale iyo Gerihel.

### ***Xarumaha Bulshada***

Si dadweynaha degmadu u helaan xarumo ay ku kulmaan kagana tashadaan danahooda waxaa shanta sano ee soo socata laga hirgelinayaa xarumo bulsho xaafadaha Gacan libaax, xingood sare, Wadajir, Xingood hoose, Libaaxar Kubo , Kaambo, Guudcad iyo Qoryacad.

### ***Amniga, garsoorka iyo xabsiga***

- Dayactir iyo ballaarin saldhigga weyn ee degmada

- Xaafadaha magaalada oo laga dhiso 3 saldhig boolis
- Booliska degmada oo lagu kordhiyo 70 xubnood
- Saldhigga booliska oo loo qoondeeyo kaabayaasha shaqo ee ciidan sida gaadiid, isgaarsiin iwm
- In la siiyo ciidanka tababarro la xiriira dembi baarista (criminal investigation) iyo xirfadaha kale ee ciidan
- In xaafadaha iyo saldhigga booliska la isku sitko si ay dadweynuhu qayb uga qaataan hawlaha nabadgelyada
- In la sugo caddaladda, tababarna la siiyo garsoorayaasha iyo kaaliyeyaaha maxkamadaha
- Inay hawlgalaan qareemo dadka danyarta ah u dooda
- In xabsiga laga asteeyo waxbarashada maxaabiista si ay u helaan xirfado ay ku shaqaystaan markay xabsiga ka baxaan, bulshadana ay dib ugu soo noqdaan iyagoo dhaqan ahaan fayow
- In la helo agabka ciidanka xabsiga Lana siiyo tababarro

## **Saadaalinta Dakhliga**

Saadaalinta khayraadka iyo qiimaynta miisaaniyada degmada Qardho waa aragti guud oo ku tusaysa lacag miisaaniyadeedka runta ah ee loo heli karo horumarinta iyo adeegyada bulshada ee Degmada Qardho ka socda, Kaas oo lagu ogaanayo qorshaha shaqo ee ka kooban tahay mashariicda la doortay iyo qabashada shaqada mashariicda.

Waana documenti ay ku jiraan macluamadka dakhliga ee lacagihii soo galay degmada ee dhamaan ilaha la yaqaan iyo kharashaadka lacagaha degmadu ku bixin doonto hawl maalmeedka sanadaha soo socda.

Waxuuna soo koobayaa dakhliga dhabta ah oo muujinaaya mashaariicda horumarinta iyo adeegyada degmada si loo hubiyo in qorshuhu ka kaaban yahay mashaariicda mudnaanta la siiyey iyo wax ka qabashadooda iyo fulinta mashaariicdaas .

Kaas oo muujiya shaxada dhakhliga iyo kharashaadkeeda la qoondeeyey iyo kaan la qoondayn iyo kan ay degmadu u madax banaan tahay isticmaalkeeda . waxaa kale oo la socda faafaahin ku saabsan in suurto gasho in la helo dhammaan dakhliga iyo kharajka sida kuwa ku cad shaxda.

Waxaa lagu tala galay maalgelinta iyo mashaariicda kharashka loo hayo si loogu daro mashaariicdaas qorshaha sanadka.

Taas oo kaa caawinaysa mashariicda ee ay awooda u leeyihiin in ay fuliso sanadaha soo socda degmadu iyadoo xisaabta lagu darsanayo dakhliga iyo kharashaha la saadaliyay



**Table ku tusaya Saadaalinta Dakhliga la filaayo 2010**

<b>Illaha Dakhliga</b>	<b>Sanadkii hore 2009</b>	<b>Sanadka 2010</b>	<b>Farqiga</b>
1. Dakhliga Canshuuraha D/hoose	3,243,660,000	3,309,600,000	61,140,000
2. Deeqda iyo Amaahda laga filayo Dowlada dhexe	---	507,192,000	
3. Maalgelinta Dibada (Donars)	--	3,200,000,000(100. 000\$)	
4. Dakhliyal kale			
5. Dakhliga hantida dawladda hoose	4800,000	4800,000	
<b>Isugeyn</b>	<b>3,248,460,000</b>	<b>7,021,592,000</b>	

**Table 15 Sadaalinta Dakhliga degmada**

**Table 2: Saadaalinta Dakhliga kharajka la filayo 2010**

Kharajka la filayo	Sanadkii hore 2009	Sanadkan 2010	Farqiga
1.Mushaharka,Gunooyinka shaqaalaha iyo howl socodsiinta xafiiska	1,087,860,000	1,357,680,000	(269,820,000)
2.Amniga iyo howgalada	340,800,000	247,939,440	92,860,560
3. Mashaariicda iyo horumarinta Arimaha Bulshada	570,000,000	546,378,000+3,200,000,000 (\$100,000) = 3,746,378,000	(3,176,378,000)
4. kharajka howl socodsiinta iyo dayactirka hantida dowlada hoose	1,105,800,000	1,206,235,200	(100,435.200)
Dayn Bixinta iyo Masiibooyinka	144,000,000	463,359,360	(319,359,360)

**Table 16 Sadaalinta Kharashka Degmada**

## Qorshaha shaqo ee sanadka 2010 ee Degmada

Magaca Mashruuca	Nooca Mashruuca	Tirada cida tooska ah uga faa iideysaneysa ee danyarta ah	Tuulo	Qiyaasta lacagta ku baxaysa	Wakhtiga la rajeynayo in la bilaabo	Wakhtiga la rajeynayo in uu dhamaado	Haday jiraan dhibaato deeganka ah oo ay ogtahay degmada	
							Yes	NO
1. Market Rehabilitation	Economic/Sanitation	4689 ( of which 1200 C, 1100 W and 1500 IDPs)	Gacan libaax	\$37,000	July 2010	October 2010		√
2. New market	Economic/sanitation	4689 ( of which 1200 C, 1100 W and 1500 IDPs)	Wadajir	18,000	July 2010	Nov.2010		√
3. Road Rehabilitation	Infrastructure	4,689 (1200 C, 1100 W and 1500 IDPs)	Gacan libaax, Xingood sare,Xingood hoose,Kaa	\$10,000	June 2010	October 2010		√

			mbo,Qory acad,iyo Wadajir					
4. Healthy Post	Health	415 (of which 200 C, 50 W, 61 IDPs)	Libow	\$11,000	August 2010	Oct.2010		√
5. Health post	Health	200 ( of which 40 W, 160 IDPs)	Dhaxan	\$11,000	Aug /2010	Oct/2010		√
6. School	Education	480 ( of which 250 W and 110 IDPs)	Libaaxar	\$13,000	Aug/201 0	Nov/2010		√

**Table 17 Qorshaha shaqo degmada sanadka 2**

## **Gunaanad:**

Document-gaan ku saabsan qaabka horumarinta degmada waxaa lagu saleeyey:

la- tashi la la yeeshay dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada Qardho.

Waxaa kaloo ka hawlgalay koox ka socota TASS oo ay UNICEF maalgelisey, iyadoo ay sidoo kalena farsamo ahaan gacan ka geysatey JPLG. Waxaa dowlad muhiim ah diyaarinta hawshaan ka qaatay hawl-wadeennada hay'adda fulinta ee dowladda hoose.

Document-gaan wuxuu horumarinta degmada Qardho u leeyahay ahmiyad ballaaran, wuxuuna si buuxda uga turjumayaa rabitaanka iyo baahida dadweynaha Qardho.

Fulinta hawlaha, barnaamijyada iyo mashaariicda uu document-gaan xambaarsan yahay waxay u baahan tahay in si wadajir ah ay uga qayb qaataan qeybaha kala duwan ee bulshada, maamulka degmada Qardho, maamulka dhexe ee Puntland, hay'adaha iyo ururrada caalimaga ah iyo kuwa maxalliga ah.

Waxaan shaki ku jirin haddii dadaal, go'aansi, hufnaan iyo rabitaan la la yimaado in la xaqiijin karo himilada iyo ujeedooyinka laga leeyahay document-gaan.

Signed by District

Commissioner/Mayor:.....Date:.....

Signed by 1<sup>st</sup> Deputy..... Date:.....

Signed by Facilitator and a representative from MOILG to witness full  
appropriate procedure for agreeing on projects:

Ministry of Interior and Local

Governance .....(sign) .....

.....(print name) Date:.....

Facilitator .....

.....(sign) .....(print name)

Date:.....

---

**Faafin: SomaliTalk.com (<http://somalitalk.com/>)**